

Warsidaha

# ISGAARSIIN

Lix biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



## Kulanka Isla Xisaabtanka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Qaranka

Maareeyaha HIQ  
oo ku guuleystay  
Labo Abaalmarinno  
oo Caalami ah

Soomaaliyo &  
Malaysiya oo  
heshiisyo muhim  
ah wada gaaray

Shirweynaha Caalamiga ah ee Bulshada Macluumaadka (WSIS+20)



Warsidaha  
**ISGAARSIIN**



**Cinwaan:**

@ : [info@nca.gov.so](mailto:info@nca.gov.so)

🌐 : <http://www.nca.gov.so>

📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

✂️ : @SomaliaNCA

🌐 : National Communications Authority of Somalia

## Warsidaha **ISGAARSIIN**

### **Warsidaha Isgaarsiin**

Waa lix-biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Waxaana lagu soo bandhigi doonaa waxqabadka hay'adda iyo wararka arrimaha Isgaarsiinta ee dalka.

### **Cinwaan:**

-  : [info@nca.gov.so](mailto:info@nca.gov.so)
-  : <http://www.nca.gov.so>
-  : [Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka](#)
-  : [@SomaliaNCA](#)
-  : [National Communications Authority of Somalia](#)

## **Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ)**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waa hay'adda mas'uulka ka ah fududeynta iyo horumarinta isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.

Waxay maamushaa qeybta isgaarsiinta ee dalka, waxaana la aasaasay iyadoo la raacayo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, kaasoo awood u siinaya inay nidaamiso qeybaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada, oo ay ku jiraan isgaarsiinta, internetka, baahinta, ICT-da, iyo adeegyada e-ganacsiga.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay ku shaqeysaa geeddi-socod hufan oo kor u qaadaya tartan caddaalad ah oo joogto ah, taasoo keenta hal-abuurnimo dhiirrigelisa maalgashiga, isla markaana ilaalisa danaha macaamiisha iyo maalgashadayaasha.

Hay'addu waxa ay ka kooban tahay dhowr waaxood oo muhiim ah, kuwaasoo kala ah:

1. Waaxda Farsamadda Isgaarsiinta
2. Waaxda Isku-xirka, Qiimaynta, iyo Adeegga Baahsan
3. Waaxda Ruqsadaha iyo Korjoogteynta
4. Waaxda Nidaamyada Macluumaadka
5. Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda

# CINWAANADA



10

Maareeyaha HIQ oo ku guuleystay labo abaalmarin Caalami



Shirweynaha Caalamiga ah ee Bulshada Macluumaadka

8



18

Xarunta Qaran ee IPv6 oo Muqdisho laga daahfuray



Golaha Wasiirrada oo ansixiyay Xeer nidaamiyaha xargaha isgaarsiinta .....

10



14


HIQ oo ka qaybgashay Shirka 30aad ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika





Aqoon isweydaarsiga Xaaladaha Degdegga ah iyo Nidaamyada Digniinta Hore ee Taleefannada Gacanta


24





 Qorshaha Istiraatiijiyadda Isbeddelka Awoodda Korjoogteynta HIQ


 Qorshaha Istaraatiijiyadda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee 2023-2027

 Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga

 Istaraatiijiyadda Qaran ee Jiilka Shanaad (5G) "Fifth Generation"

 Istaraatiijiyadda Qaran ee Internet Borotokoolka Nooca Lixaad (IPv6) ee Soomaaliya

 Warbixinta sanadlaha ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka 2024/2025

 Tilmaamayaasha Qimaha Adeegyada Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada

*Qormooyinkan iyo kuwo kaloo ka badan, ka agriso, kalana soo deg boggeena:*

[www.nca.gov.so](http://www.nca.gov.so)

# Ereyga Maareeyaha

Sanad cusub 2025 iyo waxqabad cusub. Waxaa farxad ii ah inaan caddadkan idinkula wadaago inaan mar kale xaqiijinnay guulo wax ku ool ah oo aan ka gaarnay hawsha muhiimka ah ee aan bulshada u hayno.

Waxaan ku guuleysanay Abaalmarinta Ammaanta Sare ee Adeegga Dadweynaha ee Afrika, oo ay bixiso Majaladda Hoggaanka Afrika (ALM). Sidoo kale, waxaan helnay Aqoonsi Sharafeedka Gaarka Ah ee uu bixiyo aqalka wakiillada ee Gobolka South Carolina ee dalka Mareykanka (Special Commendation Award).

Magaca Hay'adda iyo kan ummadda Soomaaliyeed ayaan ku matalay shirar iyo kulammo caalami ah oo muhiim ah, oo ay ka mid ahaayeen Shirweynihii 30aad ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika, Shirka Caalamiga ah ee Xoojinta Adkeysiga Xargaha Badda Hoosteeda Mara, iyo Madasha Horumarinta Dalalka Carabta.

Sidoo kale, qaar ka mid ah madaxda waaxyaha iyo shaqaalaha HIQ ayaa ka qaybgalay shirar iyo tababarro caalami ah oo kala duwan. Waxaan heshiisyo muhiim ah la soo saxiixnay Dowladda Malaysia. Golaha Wasiirrada ayaa ansixiyay Xeer-nidaamiyaha Xargaha Isgaarsiinta Badda Hoos Mara. Waxaa daahfurnay Xarunta Qaran ee Internet Baratakoolka IPv6. Qodobadan iyo kuwo kale ayaad kaga bogan doontaan caddadkan.

Waxaan u mahadcelinayaa dhammaan shaqaalaha iyo agaasimayaasha Hay'adda, oo mar walba ka go'an horumarka iyo kobcinta adeegga bulshada. Sidookale waxaa mahad gaar ah u celinayaa Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Xildhibaan Maxamed Aadan Macallin Cali, oo hoggaankiisa iyo dhiirrigelintiisa door weyn ka qaatay guulaha joogtada ah ee Hay'adda.

***Mahadsinidiin***



**Mudane Mustafa Yaasiin  
Sheekh**

***Maareeyaha Guud ee  
Hay'adda Isgaarsiinta  
Qaranka***

# Erayga Tifaftiraha

**As-salaamu Calaykum dhammaan  
akhristayaasheenna qiimaha leh,**

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Eebbe, noo suurtageliyay soo saarista caddadka Afaraad ee warsidaha Isgaarsiin. Wargeyskaan, oo ah warsidaha rasmiga ah ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), wuxuu xambaarsan yahay warbixinno muhiim ah oo ku saabsan waxqabadka hay'adda, horumarada socda, iyo qorsheyaasha ay hiigsanayso mustaqbalka.

Kooxda tifaftirka iyo qorayaasha, oo aan hoggaaminayo, waxaa naga go'an inaan soo ururinno xog sax ah, qorno, isla markaana aan tifaftirno warbixinno si hufnaan iyo daacadnimo leh loo diyaariyay.

Mas'uuliyaddeenna ugu horreysa waa inaan hubinno in dhammaan xogaha aan soo bandhigno ay yihiin kuwo sax ah oo si dhab ah loo xaqiijiyay, si aan u abuurno kalsooni buuxda oo ku saabsan waxyaabaha aan soo gudbineyno.

Sidoo kale, waxaan xoogga saarnaa tayeynta qoraallada, annagoo doorbidna in erayada iyo jumladaha aan isticmaalno ay noqdaan kuwo nuxur leh, qurux badan, oo si fudud loo fahmi karo.

Waxaan rajeynayaa in akhrinta caddadkan uu idiin noqodo mid xiiso leh oo aad ka heli doontaan warbixinno qiimo leh oo ku saabsan horumarrada socda iyo yoolalka mustaqbalka ee HIQ.

*Aqris wanaagsan*

*Nasro Cabdi Cusmaan*  
*Tifaftiraha Warsidaha Isgaarsiin*



*Nasro Cabdi Cusmaan*

## Kulanka Isla Xisaabtanka Wasaaradaha & Hay'adaha Qaranka

Hoggaanka sare ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda, oo uu horkacayay Wasiirka Wasaaradda, Mudane Maxamed Aadan Macallin (Soomaali), ayaa ka qeybgalay kulanka isla-xisaabtanka wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda.

Wasiirka waxaa kulanka ku weheliyay Wasiiru-Dawlaha, Wasiir-kuxigeenka, Agaasimaha Guud ee wasaaradda, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Maareeyaha Hay'adda Dhowrista Xogta.

Kulanka oo uu furay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Dan Qaran, Mudane Xamsa Cabdi Barre, ayaa diiradda lagu saaray isla-xisaabtan dhab ah, hufnaan iyo daahfurnaan lagu hirgeliyo hannaanka dowladeed.

Intii uu socday kulanka, waxaa lagu soo bandhigay wax-qabadka xukuumadda saddexdii sano ee u dambeysay ee ay jirtay Xukuumadda Dan Qaran, iyadoo madaxda wasaaradaha iyo hay'aduhuba ay soo bandhigeen wixii u qabsoomay muddadaas.





## Shirweynaha Caalamiga ah ee Bulshada Macluumaadka (WSIS+20)

**Geneva, Switzerland –**

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka mid ahaa wafdi uu hoggaaminayay Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Maxamed Aadan Macallin (Maxamed Soomaali), oo ka qeybgalay Shirweynaha Caalamiga ah ee Bulshada Macluumaadka (World Summit on the Information Society WSIS+20), kaas oo lagu qabtay magaalada Geneva ee dalka Switzerland.

Shirweynahan oo socday muddo shan maalmood ah ayaa ku saabsanaa dib-u-eegista horumarka laga gaaray tan iyo markii la bilaabay WSIS labaatan sano ka hor, iyo dejinta jihada cusub ee horumarinta teknolojiyada si ay u noqoto mid loo dhan yahay, ammaan ah, islamarkaana kor u qaadda adeegyada dowliga ah.




Intii uu shirku socday, Wasiirka iyo Maareeyaha Guud ee HIQ ayaa si mug leh uga qeybgalay doodaha sare, iyagoo iftiimiyay guulaha Soomaaliya ay ka gaartay dowladnimada dhijitaalka ah – oo ay ka mid yihiin ansixinta Siyaasadda Qaran ee Ka Mid Noqoshada Dhijitaalka (Digital Inclusion Policy) iyo hirgelinta Istaraatiijiyadda Qaran ee Isbeddelka Dhijitaalka (2025–2030).





Wasiirka iyo Madaxweynaha Estonia, Mudane Alar Karis



Maareeyaha iyo Madaxweynaha Estonia, Mudane Alar Karis

Maareeyaha Guud, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa sidoo kale ka qeybgalay doodka hoggaamiyeyaasha ee WSIS+20 (Leaders TalkX), oo diiradda lagu saaray "Dhisidda bulshooyin dhijitaal ah oo loo dhan yahay, kuna salaysan aqoon." Halkaas oo uu khibraddiisa la wadaagay madaxda kale, isagoo ka hadlay muhiimadda ay leedahay in la helo adeegyo dhijitaal ah oo la isku hallayn karo, si fudud loo heli karo, lagana wada faa'iideysan karo.

Sidoo kale, Maareeyaha Guud ee HIQ ayaa qeyb ka ahaa kulammo laba-geesood ah oo muhiim ah oo ay dowladda Soomaaliya la yeelatay madax sare oo ka socotay hay'ado caalami ah iyo dalal ay Soomaaliya la leedahay iskaashi dhanka dhijitaalka ah.

Kulamadaas waxaa ka mid ahaa:

- Kulan lala yeeshay Agaasimaha Waaxda Horumarinta Isgaarsiinta ee ITU, Dr. Cosmas Zavazava, oo looga hadlay xoojinta barnaamijyada xirfadaha dhijitaalka ah.
- Kulan Wasiirka Isgaarsiinta Malaysia, Mudane Fahmi Fadzil, oo lagu gorfeynayay iskaashiga labada dal ee maamulka dhijitaalka iyo amniga internetka.
- Kulan lala yeeshay Xoghayaha Guud ee ITU, Marwo Doreen Bogdan-Martin, oo diiradda lagu saaray xoojinta wadashaqeynta Soomaaliya iyo ITU.
- Kulan lala yeeshay Wasiirka Isgaarsiinta Sacuudi Carabiya, Inj. Cabdullaahi Aamir Al-Swaha, oo laga wada hadlay maalgelinta kaabeayaasha isgaarsiinta iyo adeegyada dowladda dhijitaalka ah.



HIQ waxay u aragtaa ka qeybgalka WSIS+20 inuu yahay fursad muhiim ah oo lagu adkeynayo xiriirka caalamiga ah, laguna xoojinayo doorka ay Soomaaliya ku leedahay go'aamada teknolojiyada adduunka, iyadoo la dhiirrigelinayo isbeddel dhijitaal oo loo dhan yahay.



# MUSTAFA YAASIIN

## Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo la guddoonsiiyay Abaalmarinno Caalami ah

### Casablanca, Morocco

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa la guddoonsiiyay laba abaalmarinood oo kala duwan.

Maareeyuhu waxa uu helay Abaalmarinta sanadka 2024 ee Adeegga Dadweynaha ee Afrika, (African Public Service Excellence Commendation Award 2024) ee ay bixiso Majaladda Hoggaaminta ee Afrika - African Leadership Magazine (ALM), taas oo lagu maamuusay kaalintiisa muhiimka ah ee xoojinta siyaasadaha nidaaminta iyo ballaarinta isku xirka dhijitaalka ah, Abaalmarinta oo uu guddoonsiiyey H.E Jakaya Kikwete Madaxweynihii hore ee dalka Tanzania (2005 -2015), madasha waxaa sidoo kale goobjoog ka ahaa H.E Andry Rajoelina Madaxweynaha Dalka Madagascar.





**Madaxweynihii hore ee dalka Tanzania H.E Jakaya Kikwete oo Maareeyaha HIQ guddoonsiinaya Abaalmarinta sanadka 2024 ee Adeegga Dadweynaha ee Afrika.**

Mareeyuhu wuxuu kale ee uu helay aqoonsi sharafeedka gaarka ah oo uu bixiyo aqalka wakiillada ee Gobolka South Coralina ee dalka Mareykanka (Special Commendation Award), kaas oo lagu aqoonsaday dadaalkiisa ku aaddan horumarinta isbeddelka dhijitaalka ah iyo kor u qaadidda heerarka xeernidaamint, Abaalmarinta oo uu ansixiyey Aqalka ayaa waxaa guddoonsiisay Rep. Dr Rosalyn Henderson- Myers.

**Waa Socota..eeg bogga 14**





Abaalmarinnadan ayaa lagu bixiyay Xafladdii 13-aad ee Majaladda Shakhsiyaadka Hoggaaminta Afrika, taasoo lagu qabtay magaalada Casablanca ee dalka Marooko, halkaas oo Mudane Mustafa uu sidoo kale ka jeediyay khudbad gaar ah oo ay jeedinayeen hoggaamiyeyaal sare oo ka kala socday dawladaha, jaamacadaha, iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.

Munaasabadda Shakhsiyaadka Hoggaaminta Afrika, oo ah madal sanadle ah, ayaa isugu yimid hoggaamiyeyaal iyo siyaasad-dejiyayaal sumcad leh, iyadoo halku-dhigga sannadkan uu ahaa: "Hoggaan loo dhan yahay oo loogu gogol-xaaraayo Afrika oo isku xiran: Hababka Cusub ee Xaqiiqooyinka Mustaqbalka." Munaasabadda waxa lagu soo bandhigay khudbado muhiim ah, dood-cilmiyeedyo, iyo abaalmarinno lagu sharfay shakhsiyaad kaalin muuqata ka qaatay horumarka qaaradda.





Mudane Mustafa, oo ka hadlay abaalmarinnada la guddoonsiiyay, ayaa yiri: “Aqoonsigan waxa uu caddeyn u yahay horumarka Soomaaliya ay ka sameysay xagga maamul-wanaagga dhijitaalka ah iyo dadaalka HIQ ay ugu jirto dhismaha mustaqbal isku-xiran oo sugan. Abaalmarintan waxaan u hibeeyay shaqaalaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Shirkadaha Isgaarsiinta iyo shacabka Soomaaliyeed, kuwaas oo adkaysigooda iyo hal-abuurkooda uu horseeday guulaha la gaaray.”

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay sii xoojineysaa dadaallada lagu dhisayo mustaqbal dhijitaal ah oo horumarsan, iyadoo xoojinaysa siyaasadaha kor u qaadaya isku-xirka, amniga internet-ka, iyo hagaajinta xeernidaaminta isgaarsiinta.



**Madaxweynaha Dalka Madagascar H.E Andry Rajoelina iyo Afadiisa oo ka soo qaybgalay Munaasabadda bixinta abaalmarinnada.**



**Panel 1: The State of Submarine Cable Resilience Today**

Overview of key risks, current challenges, and resilience measures



**H.E. Mr. Mustafa Yaasin Shekh**  
Director General of National Communications Authority of Somalia, Somalia

**Mr. Zhiguo Zhao**  
Chief Engineer of Ministry of Industry and Information Technology of the People's Republic of China, China

**Mr. Vincent Lemaire**  
VP Special Projects of Alcatel Submarine Networks

**Ms. Funke Opeke**  
Managing Director of MainOne

**Moderator: Mr. John Orno**  
Secretary General of the African Telecommunications Union (ATU)

Hosted by:



#SubcableSummit

Organised by:



42

**Shirka Caalamiga Ah  
EE XOOJINTA  
ADKEYSIGA  
XARGAHA BADDA  
HOOSTEEDA MARA**

**Abuuja, Nayjeeriya**

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa ka qayb galay Shirka Caalamiga ah ee Xoojinta Adkeysiga Xargaha Badda Hoosteeda Mara, kaas oo lagu qabtay magaalada Abuuja ee dalka Nayjeeriya. Shirkan oo socday laba maalmood ayaa waxaa isugu yimid madaxda hay'adaha isgaarsiinta, Shirkadaha ganacsiga iyo khabaro qaybta isgaarsiinta si looga wado hadlo caqabadaha iyo horumarinta amniga xargahaasi.

Maareeyaha oo xubin ka ah Hay'adda Talobixinta Caalamiga ah ee Xoojinta Kaabayaasha Isgaarsiinta ee Xargaha Badda Hoosteeda Mara (International Advisory Body for Submarine Cable Resilience), ayaa ka qayb galay wadahadallo lagu dejinayay istaraatiijiyado caalami ah si loo xoojiyo amniga iyo adkeysiga xargahaas. Wuxa uu sidoo kale ka qayb galay kulankii labaad ee Hay'adda latalinta.

Kulanka kaddib wuxuu ka qeybgalay dood-wadaag heer sare ah oo looga hadlayay xaaladda amniga xargaha isgaarsiinta ee badda hoosteeda mara; Intii uu Dood Wadaaga ka hadlayay, wuxuu tilmaamay khataraha sii kordhaya ee ka dhanka ah kaabayaasha muhiimka ah ee isgaarsiinta, wuxuuna xoojiyay baahida loo qabo iskaashi caalami ah si loo sugo isku-xirka isgaarsiinta.

Isagoo ka hadlayay shirka, Mudane Mustafa wuxuu yiri: "Xargaha badda hoosteeda mara waa laf-dhabarta isku-xirka caalamiga ah, amnigooduna wuxuu muhiim u yahay kobaca dhaqaalaha, xasilloonida, iyo hal-abuurka. Waana lama huraan in dowladaha iyo daneeyayaasha isgaarsiinta ay iska kaashadaan hirgelinta siyaasad horumarsan, maalgeliyaan kaabayaal adkeysiga leh, si loo ilaaliyo shabakadaha muhiimka u ah isgaarsiinta caalamiga."

Ka-qaybgalka Mudane Mustafa ee shirka wuxuu sii xoojinayaa doorka sii kordhaya ee Soomaaliya ee dadaallada adkeysiga dhijitaalka ah ee caalamka.



# GOLAHA WASIIRRADA

## oo Ansixiyay Xeer-nidaamiyaha Xargaha Isgaarsiinta ee Badda Hoos Mara

*Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Mudane Maxamed Aadan Macallin*



Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa si rasmi ah u ansixiyay Xeer-nidaamiyaha Xargaha Isgaarsiinta Badda Hoos mara (Submarine Cable Regulation), taasi oo ka dhigan in guul laga gaaray geeddi-socodka isbeddelka dhijitaalka ah ee dalka.

Xeer-nidaamiyaha oo ay diyaarisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa lagu maamuli doonaa dhammaan shirkadaha rukhsadda leh ee ka hawlgala saldhigyada xargaha badda hoosteeda mara iyo guud ahaan xargaha isgaarsiinta ee dhex mara badda hoosteeda ee dalkeenna.

Ujeedooyinka aasaasiga ah ee xeer-nidaamiyahan ayaa waxaa ka mid ah in la kordhiyo awoodda baaxadda internet-ka ee yimaada gudaha dalkeenna, isla markaana la dejiyo shuruudo cad oo ku saabsan helidda adeeg loo wada dhan yahay oo ku saleysan baaxadda internet-ka caalamiga ah (international bandwidth), si loo fududeeyo horumarinta suuq furan oo tartan leh. “Waxaan u mahadcelinayaa Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane

Maxamed Aadam, oo xeer-nidaamiyaha horgeeyay Golaha Wasiirrada, una ololeeyay ansixintiisa,” ayuu yiri Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Ansixinta xeer-nidaamiyahan waxa ay caddeyneysaa sida ay dowladda uga go'an tahay hubinta in shirkadaha kale ee rukhsadda heysta ay gaari karaan saldhigyada xargaha si cadaalad ku dhisan iyadoo la xaqiijinayo kaabayaal adag oo taageera kobaca dhaqaalaha dhijitaalka ah ee sii kordhaya ee dalkeenna.

## Xeer-nidaamiyaha

# XARGAHA BADDA HOOS MARA:

## Tiir Muhiim u ah Kobaca Isgaarsiinta iyo Dhaqaalaha Dalka

W/Q: Nasro Cabdi Cusmaan

Xargaha fiber-ka ee badda hoosmara waxa ay qaadan in ka badan 99% xogta internet ka aduunka, iyadoo fududeeyay in si fudud ay iskugu xirmaan qaaradaha aduunka. Xargaha fiber-ka badda ee mara qaaradda Afrika ayaa kordhay tobankii sano ee ugu dambeysay, taas oo sare u qaaday xawaaraha internetka isla markasna abuurtay fursado shaqo iyo kobac dhaqan dhaqaale ee ku yimid dalal badan oo Afrika ka yaal.

Maanta waxaa jira boqolaal xargo oo badda hoos mara oo dunida isku xira, Afrika waxaa mara ilaa 77 xargo oo isku-xira shabakadaha internet ka ee qaaradda iyo kuwa dunida kale. Dalkeenna waxaa mara in ka badan shan xarig oo badda hoosteeda ah, waxaana sidoo kale socda dhismaha xargo kale.

Si loo fuliyo qorshaha Isbedelka Soomaaliya ee 2025-2029, iyo qorshaha istaraatiijiyadda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Hay'adda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa soo saartay Xeer-nidaamiyaha Xargaha Isgaarsiinta Badda Hoosmara ee 2025, oo ah xeer dhigaya hab-raac cad oo lagu maareeyo xarumaha iyo


adeegyada xargaha fiber-ka ee badda mara. Xargahan casriga ah ayaa ah halbowlaha isku-xirka internet-ka caalamiga ah ee dalkeenna soo gala, taas oo fursad weyn u ah horumarinta teknoolojiyadda iyo dhaqaalaha dalka. Xargaha Fiber-kadda badda hoos mara waxa ay kor u qaadayaan maalgashiga ganacsi oo ka tarjumaya kobac dhaqaale oo la taaban karo.

Daraasad ay sameysay xarunta dhaqaalaha ee Copenhagen ayaa tilmaamaya in xargaha cusub ee fiber ka badda hoos mara ay u qaadayaan dhaqaalaha dalalka wax ka badan hal bilyan oo doolar, waxa ay hoos u dhigaan qiimayaasha internet ka ilaa 13%. Hoos u dhacaan waxa ay faa'iido badan u leedahay ganacsiyada yaryar, iyo adeegyada dhijitaalka ku saleysan. Waxa ay kaloo kordhinaysaa tartanka adeegyada isgaarsiinta ee suuqa, bulshadana u sahleysa in ay helaan adeeyo isgaarsiineed oo kala duwan oo ay kala dooran karaan.

Xeer-nidaamiyahan waxa uu sharciyeeyey in shirkad kasta oo doonaysa inay soo dejiso ama ka shaqeyso xargaha fiber-ka ay heysato rukhsadaha iyo oggolaanshayaasha lagama maarmaanka ah, oo ay ka mid yihiin fasaxyada amniga iyo ilaalinta deegaanka.

Nidaamkan ayaa sare u qaadaya isla xisaabtanka iyo hufnaanta, isagoo yareynaya caqabado iyo isqabqabsi ka dhici kara maamulka kaabayaasha muhiimka ah.

Mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee xeerkan ayaa ah in uu si cad u waajibinayo shirkadaha leh saldhigyada soo dejinta xargaha inay adeegga helitaanka iyo "isla-degitaanka" (co-location) u fidiyaan shirkadaha kale ee rukhsadda heysta, si cadaalad iyo takoorid la'aan ah. Tani waxay xoojinaysaa tartan furan oo ganacsi, waxayna ka dhigaysaa suurtagal in



macaamiisha Soomaaliyeed ay ka faa'iidaystaan adeegyo internet oo xawaare sare leh iyo qiime macquul ah.

Xeernidaamiyahu sidoo kale waxa uu ku dhiirrigelinayaa kororka baaxadda internet-ka dalka soo galaysa, taas oo si toos ah u taageeraysa kobaca ganacsiga dhijitaalka ah, adeegyada maaliyadeed ee casriga ah, iyo horumarinta adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka ee ku tiirsan isku-xirka internet-ka.

Dhinaca deegaanka iyo bulshooyinka xeebaha ku nool, shirkadaha waxaa laga doonayaa inay diyaariyaan warbixin saameynta deegaanka iyo bulshada (Environmental and Social Impact Assessment) ka hor inta aan la bilaabin howlaha rakibidda. Shuruudahan adag ayaa dammaanad qaadaya in horumarka teknoolojiyaddu uusan waxyeello u geysan deegaanka ama bulshada ku dhow.

Kororka Xargaha fiber-ka badda ee Soomaaliya laga hirgeliyay waxa ay u sahleysaa in dalka uu noqdo xarun istaraatiiji ah oo isku-xira qaaradaha Afrika iyo Aasiya.

Sidoo kale Soomaaliya waxa ay ka faa'ideysan doontaa isku-socodka xogta ee bariga afrika, iyo dalalka kale ee dunida, iyo adeegsida teknoolojiyadda oo muhim u ah horumarka ganacsiga dhijitaalka,

adeegyada maaliyadeed, iyo adeegyada kale ee caafimaadka iyo waxbarashada. Xargaha fiberka badda waxa ay ka mid yihiin kaabayaasha muhimka ah ee dalka (Critical Infrastructure), kuwaas oo uu dhaqaalaha dalka ku tiirsanyahay. Arrintaasi waxay muujineysa muhimadda helitaanka nidaamyo iyo xeerar wax ku ool ah oo ilaalinaaya kaabayaasha internet ka.

Xeernidaamiyuhu waxa uu qeyb ka yahay dadaalladaas, isagoo soo bandhigaya habraacyo lagu xaqiijinayo in xargaha fiber-ka badda ay noqdaan kuwo la isku halleyn karo, si dhowna loola socdo dhismayaashooda, kaalinta ay shirkadaha ajnabiga ah ku leeyihiin, iyo in xargaha ka soo degaya Soomaaliya ay waafaqsan yihiin shuruucda dalka iyo badqabka deegaanka — iyadoo sidoo kale aanay halis ku noqon amniga qaranka.

Sidaas awgeed, Xeernidaamiyaha Xargaha Badda Hoosmara ma aha oo kaliya xeer farsamo, balse waa dhiirrigelin maalgelineed, oo tilmaamaya yididiilo cusub oo ku wajahan isku xirka Soomaaliya, iyo dunida, ilaalinta amniga qaranka, iyo abuuridda shaqooyin cusub. Xeernidaamiyaha waa mid ku dhisan daahfurnaan, cadaalad iyo ilaalin deegaanka, si loo yareeyo caqabaha soo wajahda yareyn internetka Soomaaliya, kordhin doona maalgelinta iyo abuurista shaqooyin, wuxuuna Soomaaliya u horseedi doonaa mustaqbal dhijitaal oo xasiloon.

Gebogebo:-

Xeer-nidaamiyaha Xargaha Badda Hoosmara waxa uu Soomaaliya u furayaa waddo cusub oo lagu heli karo kaabayaal isku xiraya dalka iyo caalamka, korna u qaadaya kalsoonida maalgashiga, shaqo-abuurka, iyo adeegyada casriga ah ee bulshada loogu adeego. Waa tallaabo istaraatiiji ah oo lagu dhisayo mustaqbal dhaqaale iyo teknoolojiyadeed oo waara.



## Xeernidaaminta Xarkaha Internetka

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa qabatay kulan wadatashi ah oo lagu gorfeynayo qabyo-qoraalka Xeer-nidaamiyaha Xargaha Badda Hoosteeda Mara (Submarine Cable Landing Regulation). Kulankan ayaa waxaa isugu yimid qaar ka mid ah shirkadaha isgaarsiinta dalka oo ay matalayeen madax sare, sharciyaqaanno, iyo khabarada dhinaca farsamada ee shirkadaha.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo furay kulanka, ayaa faahfaahiyay muhiimadda istaraatiijiyadeed ee uu leeyahay xeer-nidaamiyahan iyo sida uu ula jaanqaadayo habraacyada caalamiga ah.





“Dalkeenu wuxuu leeyahay mid ka mid ah xeebaha ugu dheer Afrika, taas oo fursad weyn u ah dhismaha kaabayaasha xargaha badda hoosteeda mara. Kheyraadkan Alle nagu manneystay wuxuu sare u qaadi karaa in internetka la gaarsiyo dalka oo dhan iyo guud ahaan dalalka aan badda lahayn ee ku yaalla Bariga iyo Bartamaha Afrika,” ayuu yiri Mudane Mustafa.

“Haddaba, si aan fursaddan uga faa’iidaysanno fursaddaas, waa in aan qaadannaa halbeegyada caalamiga ah oo aan hirgelinno xeer-nidaamiyayaal dhiirrigeliya kaabayaal ammaan ah, oo ku qotoma tartan furan,” ayuu sii raaciyay Maareeyuhu.



Mudane Mustafa ayaa sidoo kale u mahadceliyay Hay’adda IFC, taasoo si joogto ah u taageerta horumarinta kaabayaasha internet-ka ee dalkeena, taas oo ka caawisay Hay’adda dhinaca khubarada daadihinayay kulankan.

Wadatashigan ayaa diiradda lagu saaray dhinacyada muhiimka ah ee qabyoqoraalka xeer-nidaamiyahasida: qaab-dhismeedka shati-siinta iyo u-hoggaansanaanta shuruucda, amniga, shuruudaha isku-xirka, iyo saameynta guud ee ballaarinta heer qaran iyo heer gobol. Qabyo-qoraalka xeer-nidaamiyahan ayaa lagu saleeyay talooyin ka soo baxay kulamadii lala yeeshay shirkadaha isgaarsiinta bishii Sebtembar 2024.

Ka dib kulanka wadatashiga, waxaa shirkadaha isgaarsiinta iyo internetka laga codsadey inay talooyinkooda ku saabsan xeer-nidaamiyaha oo qoran soo gudbiyaan 30-ka Abriil 2025.



## U-HOGGAANSANAANTA

# Xeernidaamiyaha Xargaha Badda



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa qabatay kulan looga hadlay u-hoggaansanaanta Xeernidaamiyaha Xargaha Fiberka ee Badda hoosteeda mara.

Kulanku waxa uu isu keenay shirkadaha xarumaha xargaha fiber-ka badda maamula, shirkadaha Isgaarsiinta, iyo kuwa internetka si looga hadlo waajibaadka u hoggaansanaanta, foomka warbixinta sannadlaha, marxaladaha warbixinta u hoggaansanaanta iyo taariikhaha muhiimka ah ee soo gudbinta, rukhsadaha iyo oggolaanshaha xargaha fiberka badda.

Maareeyaha Guud, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa furay kulanka isaga oo ka hadlay sida hay'addu uga go'an tahay hirgelinta u hoggaansanaanta iyo fursadaha la xiriira xeernidaamiyahan.

"Soomaaliya maanta waxay leedahay qaab-sharci casri ah oo cad, annagana waxaanu ka filaynaa in rukhsadlayaashu si buuxda u gutaan waajibaadkooda," ayuu yiri Maareeyuhu oo intaa ku daray "Xeernidaamiyahani waxa uu abuurayaa fursado dhaqaale, wuxuuna dalkeenna ka dhigaa xarun istaraatiiji ah oo isku xira Bariga iyo Bartamaha Afrika"



Maareeyaha oo hadalkiisa sii wata ayaa xusay inay lagamamaarmaan tahay u-hoggaansanaanta, ilaalinta iyo hirgelinta xeer-nidaamiyahan oo uu sheegay inuu horseedo helidda dhaqaale dhijitaal ah oo xooggan.

Kulanku waxa uu daba socday ansixintii Golaha Wasiirrada ee 12 Juunyo 2025 ee Xeernidaamiyaha Xargaha Fiberka Badda, kaas oo dejiyey hanaanka maamul ee ku saabsan helitaanka bandwidth-ka caalamiga ah, isla markaana xoojiyey jidka dalkeenna ee ku aaddan isku-xirnaan adkaysi leh iyo tartan caafimaad qaba oo suuqa isku-xirka ah.



## Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ka qaybgashay Shirka GISEC 2025



Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Mudane Axmed Cali Salaad ayaa ka qaybgaley Bandhigga iyo Shirka sanadlaha ah ee Amniga Internet-ka (Gulf Information Security Expo & Conference (GISEC)) 2025 oo lagu qabtay magaalada Dubai ee Dalka Iskutaga Imaaraatka Carabta 06 – 08 Maajo 2025.

Bandhiga Amniga Internet-ka iyo Shirka ayaa waxaa kasoo qaybgaley aqoonyahano iyo khabaro Amniga Internet-ka iyo shirkado caalami ah oo ka kala yimid wadamo kala duwan. Shirkaddahani waxay soo badndhigeen qalab iyo adeegyo casri ah oo kor u qaadaya kahortaga iyo xoojinta amniga internet-ka ee dowladdaha, shirkadaha isgaarsiinta, bangiyada, iyo dhammaan shirkadaha adeegsada teknooljiyada iyo internetka, gaar ahaan shirkaddaha bixiya kaabayaasha muhiimka ah (Critical Infrastructure Providers).

Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa booqday shirkadaha hormuudka ka ah Amniga internet-ka. Sidoo kale, wuxuu la yeeshay wadahalallo hordhac ah iyo isbarasho madax ka socotay dalal kale, isaga oo kala hadlay sidii loo xoojin lahaa kahortagga khataraha internet-ka, loo kordhin lahaa wacyigelinta bulshada, iyo loo adkeyn lahaa wadashaqeynta labada dhinac.

Intaa waxaa dheer, in Maareeye Ku-xigeenku uu wadahalallo iyo shirar la qaatay qaar ka mid ah shirkadaha iyo wakiillada dalalka ka soo qaybgalay shirka, kuwaas oo ku saabsanaa is-dhaafsigu xogaha amniga internet-ka iyo hirgelinta tababarro lagu qabto khadka internet-ka ah (online trainings).

Bandhigga Amniga Internet-ka (GISEC) wuxuu door weyn ku leeyahay isku-xirka iyo wadashaqeynta dowladaha, bangiyada, shirkadaha isgaarsiinta, iyo kuwa sameeya qalabka iyo teknoolojiyadda casriga ah ee la xiriirta amniga internet-ka, si ay ula jaanqaadaan marxaladaha cusub ee horumarka teknoolojiyadda.

## Shirweynaha 30aad

# URURKA ISGAARSIINTA BARIGA AFRIKA

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa ka qeybgalshay Shirweynaha 30aad ee Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO), kaasoo laguqabtay caasimadda dalka Koonfurta Suudaan ee Juba.

Shirweynahan, oo ay martigelisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee Koonfurta Suudaan, ayaa si rasmi ah u furmay 9-kii Juunyo 2025, waxaana la soo gabagabeeyay 13-kii Juunyo 2025.

Shirka waxaa isugu yimid wakiillo ka kala socda shanta qeybood ee xubnaha ka ah EACO, sida hay'adaha nidaamiya

isgaarsiinta, hay'adaha boostada, shirkadaha isgaarsiinta, iyo shirkadaha bixiya adeegyada internet-ka ee Bariga Afrika.

Shirweynaha sanadkan ayaa muhiimad gaar ah u leh Soomaaliya, maadaama ay dhawaan ku biirtay Bulshada Bariga

“

Shirarka noocan oo kale ah muhiim ayay u yihiin HIQ, maadaama aanu ka mid nahay hay'adaha maareeya isgaarsiinta gobolka, isla markaana aan fahamsannahay in isgaarsiintu aysan xuduud laheyn sababo badan awgood oo ay ka mid yihiin in adeegyada isgaarsiinta dalkeenu ay u gudbaan dalalka gobolka (roaming), la wadaago barnaamijyo teknolojiyadeed oo gobolka ka shaqeeya, iyo khataraha amniga internet-ka oo aan ku ekeyn hal dal oo kaliya,” ayuu yiri Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, Maareeyaha Guud ee HIQ.

”



Afrika (EAC). Kaqeybgalka HIQ Soomaaliya wuxuu muujinayaa sida ay uga go’an tahay in ay la jaanqaaddo siyaasadaha iyo xeernidaamiyeyaasha isgaarsiineed ee gobolka si loo dardaregliyo iskuxirnaanta iyo kobaca tiknoolajiyadda isgaarsiinta ee gobolka.

“Shirarka noocan oo kale ah muhiim ayay u yihiin HIQ, maadaama aanu nahay mid ka mida hay’adaha maareeya isgaarsiinta gobolka, isla markaana aan fahamsannahay in isgaarsiintu aysan xuduud laheyn sababo badan awgood oo ay ka mid yihiin in adeegyada isgaarsiinta dalkeenu ay u gudbaan dalalka gobolka (roaming), la wadaago barnaamijyo teknoolajiyadeed oo gobolka ka shaqeeya, iyo khataraha amniga internet-ka oo aan ku ekeyn hal dal oo kaliya,” ayuu yiri Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, Maareeyaha Guud ee HIQ.



# STARLINK


## oo la guddoonsiiyay rukhsadda adeegga internetka



# STARLINK

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa Shirkadda Starlink guddoonsiisay rukhsadda isgaarsiineed oo ay kaga howlgeleyso dalka. Munaasabadda guddoonsiinta oo ka dhacday caasimadda ayaa waxaa ka soo qeybgalay mas'uuliyiin ka socda Dowladda iyo Shirkadda Starlink.

Maareeyaha HIQ Mudane Mustafa Yaasin Sheekh oo xafladda guddoonsiinta ka hadlayay ayaa sheegay



in soo-gelitaanka Starlink ee Soomaaliya ay wax weyn ka tari doonto dadaallada lagu doonayo in adeegyada internetka lagu gaarsiiyo dalka oo dhan.

“Waxa aan rajeyneynaa in adeeggan uu si gaar ah u anfici doono shacabka Soomaaliyeed iyo guud ahaan ganacsiyada, hay’adaha dowladeed ee ka baxsan magaalooyinka waaweyn oo adeegga internet-ku xaddidan yahay,” ayuu yiri Maareeyuhu.

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Maxamed Aadan Macallin, oo munaasbaadda goobjoog ka ahaa, ayaa sheegay in dowladdu ku faraxsan tahay in Starlink soo gaarto dalkeena.

“Waxaan soo dhoweyneynaa in Starlink soo gaarto dalkeena. Tallaadaban waxay la jaanqaadeysaa

aragtida fog ee dowladda ee ah in shacabka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan la gaarsiiyo adeeg internet oo meel kasta gaari kara, isla markaana la awoodi karo,” ayuu yiri wasiirka.

Adeegga internetka ee Starlink ayaa la filayaa in uu kaabi doono adeegyada Isgaarsiinta ee dalka jira, isaga oo wax weyn ka tari doono in adeegga internetku wada gaaro dalka oo dhan, isagoo sahlaya in adeegyada looga faa’iideysto internetka uu wada gaaro dadweynaha oo dhan.

Dalkeena waxaa hore u soo gaaray dhowr xarig internet oo ka soo degay qaar ka mid ah xeebaha dalka, iyadoo Starlink-na ay ku soo kordhineyso adeeg cusub oo internet ah oo lagu bixinayo dayaxgacmeedka oo gaari kara meel kasta oo dalka ka mid ah.

# HABRAACII RUKHSAD BIXINTA EE ADEEGGA INTERNET-KA STARLINK

**H**ay'adda Isgaarsiinta Qaranka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa qaadatay qaab rukhad bixin isku dheelitiran oo ku saleysan habka tijaabada xeernidaamineed (regulatory sandboxes) oo ku saleysan wadatashiyo lala sameeyo daneeyayaasha, iyo la jaanqaadidda tusaalooyinka caalamiga ah ee Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU). HIQ rukhsad bixintan waxay u martay 3 marxaladood iyadoo muhimmad gaar ah la siinayay hal-abuurka teknoolojiyada iyo xasiloonida suuqa (market stability).

Seddaxda Marxaladood ee HIQ u martay Rukhsadiinta Shirkadda Starlink, waxay kala ahaayeen:-

## 1 Qiimeynta Qorshaha Farsamo

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxay si qoto dheer u qiimeysay qorshaha ganacsi iyo farsamo ee ay soo gudbisay shirkadda Starlink, iyadoo laga fiirinaayo dhinacyada soo socda:



**b) In adeeggan cusub uu yahay mid kaabaya** adeegyada hadda ka jira suuqa dalka, oo uusan aheyn mid beddelaya ama burburinaaya adeegyada isgaarsiineed ee ka jira dalka.

**t) In adeeggan cusub uu yahay mid xoojinaya** maalgashiga maxalliga ah ee isgaarsiinta, si loo hubiyo kororka maalgashiga Soomaaliyeed ee Isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka.

**j) In qaabka adeeggan loo bixinaayo uu yahay** mid dan u ah macaamiisha Soomaaliyeed, xuquuqdooda na ilaalinaayo, ayna awoodi karaan, iyo

**x) In adeeggan uusan halis ku aheyn amniga** qaranka ee dalka

## 2 Wadatashiga Daneeyayaasha

Kaddib marka ay HIQ hubisay in qorshaha ganacsi iyo farsamo ee Starlink uu waafaqsan yahay istaraatiijiyadda Hay'adda, sidoo kale uusan suuqa halis ku ahayn, waxay bilowday in ay wadatashiyo la sameeyso dhammaan daneeyayaasha Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada:



**b) Shirkadaha Isgaarsiinta iyo kuwa Internetka** HIQ waxa ay kulamo shirkadaha Isgaarsiinta dalka iyo kuwa internetka bixiya si ay u hesho taladooda ku aadan rukhsad siinta shirkadda Starlink.

**t) HIQ waxa ay qabanqaabisay kulan** ay ka soo qeybgashay Starlink oo ay uga jawaabeyso su'aalaha shirkadaha iyo qaabka wadashaqeyn ee ay wada yeelan karaan.

**j) HIQ waxay wadatashiyo la sameysay hay'adaha dowladda** ee ay khuseyso, sida hay'addaha amniga qaabilsan si ay u dhageystaan talooyinkooda iyo arrimaha u baahan in xal loo helo inta aan shirkadda Starlink la siinin rukhsad.

**x) HIQ waxay kulamo la qaadatay macaamiisha** daneyneysa arrimahaan, si ay u soo gudbiyeen fikradahooda ku aaddan rukhsad siinta Starlink.

### 3 Diyaarinta iyo Bixinta Rukhsadda Ku-meelgaar ah

HIQ, Kaddib markii ay tixgelisay soo jeedintii wadatashiyada kala duwan iyo talooyinka la soo jeediyay, waxa ay diyaarisay rukhsad ku-meel gaar ah oo ku xaddidan muddo 2 sano.



#### b) Rukhsadda waxa ay leedahay

**shuruudo gaar ah** oo loogu talagalay in lagu xaliyo caqabadaha imaan kara, laguna ilaalinaayo danaha macaamiisha iyo tartanka suuqa. Si loo ilaaliyo danaha macaamiisha, shuruudaha rukhsadda waxaa ka mid ah in shirkaddu yeelato wakiilo maxalli ah oo ka shaqeeya gudaha dalka, kana jawaaba baahiyaha macaamiisha.

#### t) Diiwaangelinta macaamiisha ayaa

**sidoo kale** la dhaqangelin doonaa, si loo hubiyo danaha macaamiisha iyo ilaalinta amniga qaranka. Sidoo kale muddada rukhsadda oo 2da sano ah waxa ay waqti u siineysaa HIQ in ay qiimeyso saameynta adeeggan uu suuqa ay ku yeelan karo iyo qiimeynta caqabadaha imaan doona inta lagu guda jiro xilligan.

## MACLUUMAAD DHEERI AH

Teknolojiyada Internetka ee ku dhisan dayax-gacmeedyada ku wareegga meel hoose (Low Earth Orbit) ayaa muujineysay in ay wax ka beddeli karto qaabka adeegyada internetka lagu bixiyo.

Marka lala barbardhigo nidaamka dayax-gacmeedyadii hore ee aan warwareegin (geostationary), kuwan waxa ay bixin karaan adeeg isgaarsiineed oo dheereeya, oo hakad yar leh (low latency). Sidoo kale, dayax-gacmeedyadan yaryar ayaa waxaa ku baxa qarash ka yar kuwii hore, taas oo keeneysa in adeeg isgaarsiineed oo la awoodi karo ku soo kordhiyaan dunida.

Teknolojiyadan ayaa loo arkaa in ay dabooli karto baahiyaha internetka gaar ahaan meelaha fogfog oo ay adeegyada isgaarsiinta caadiga ah aysan gaarin, sidoo kalena waxaa looga faa'ideysan karaa isgaarsiinta meelaha musiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ah ka dhacaan, iyadoo si fudud loogu soo celin karo kaabayaasha isgaarsiinta ee burburay.

Fursadahan ka sokow, adeegyada dayaxgacmeedyada ku wareega meel hoose, sida Starlink ayaa ah kuwo ku shaqeeya heer caalami ah oo aan hal dal ku koobneyn, taas oo keeneysa in dowladaha ay ka fikirkaan habka ugu habboon ee ay ogolaansho u siin karaan, iyadoo la tixgelinaayo tartanka suuqa isgaarsiinta, isticmaalka kheyraadka hirarka (spectrum resources), ilaalinta xogta, iyo ilaalinta xuquuqda macaamiisha.


# SOOMAALIYA IYO MALAYSIA

## HESHIISYO IS-AFGARAD

oo la xiriira Maamulka Dhijitaalka iyo Amniga Internetka

Cyberjaya, Malaysia





Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ee Soomaaliya ayaa laba Heshiis Is-Afgarad (MOU) la saxiixatay Hay'adda Isgaarsiinta iyo Warbaahinta Malaysia (MCMC) iyo Hay'adda Amniga Internetka ee Malaysia (Cyber Security Malaysia).

Heshiisyadan ayaa xoojinaaya iskaashi dhinacyo badan leh oo ku saabsan maamulka dhijitaalka, wadashaqeynta farsamo iyo kobcinta amniga internetka.

Heshiiska ugu horreeya ee lala saxiixday MCMC ayaa diiradda saaraya iskaashiga dhinacyada: Xeerndaaamiyayaasha iyo qaab-dhismeedka farsamada ee 5G, isweydaarsiga siyaasadaha maamulka isgaarsiinta, iyo barnaamijyo tababarro gaaban iyo khibrad is-dhaafsi lagu xoojinayo awoodda hay'adaha.

Heshiiska labaad ee lala saxiixday Hay'adda Amniga Internet ka Malaysia (Cyber Security Malaysia) wuxuu ku saabsan yahay ka-hortagga iyo ka-jawaabista weerarrada internetka, isdhaafsi xogta khatarta ah iyo isbeddellada amniga Teknolojiyada, iskaashi ku saabsan diblomaasiyadda internetka, iyo in dalkeena uu qeyb ka noqdo barnaamijka caalamiga ah ee tababarrada ee Global ACE.

Guddoomiyaha Hay'adda Isgaarsiinta iyo Warbaahinta Malaysia, YBhg. Tan Sri Maxamed Salim bin Faatix Din, ayaa muujijey muhiimadda uu leeyahay iskaashiga caalamiga ah ee dhanka horumarinta xeerndaaamiyayaasha, isagoo ku tilmaamay heshiiskan inuu yahay madal lagu dardargelin karo isweydaarsiga aqoonta iyo iskaashiga farsamo.

Dhanka kale, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, ayaa sheegay in heshiiskan uu ku soo beegmay xilli muhiim ah, isla markaana uu kaalin weyn ka ciyaari doono kobcinta xirfadaha howlwadeennada Hay'adda iyo dardargelinta isbeddelka dhijitaalka ee dalka.

Sidoo kale, intii ay socotay munaasabadda saxiixa heshiiska la galay Hay'adda Amniga Internet ka Malaysia, Madaxa Fulinta ee hay'adda, Dato' Ts. Dr. Haji Amirudiin Bin Cabdul Wahab, ayaa ku tilmaamay iskaashigan fursad muhiim u ah in la xoojiyo adkeysiga wadajirka ah ee ka dhanka ah khataraha cusub ee internet ka.

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa uga mahadceliyay doorkooda aqooneed iyo diyaar garowgooda wadashaqeyn, isagoo xusay in iskaashiga noocan ahi uu udub dhexaad u yahay dhisidda awoodda amniga internetka ee Soomaaliya.

Heshiisyada waxaa u kala saxiixday Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, iyo YBhg. Tan Sri Maxamed Saalim bin Faatix Diin, Guddoomiyaha Hay'adda Isgaarsiinta iyo Warbaahinta Malaysia. Halka Dato' Ts. Dr. Xaaji Amiirudiin Bin Cabdul Wahaab, Madaxa Fulinta ee Hay'adda Amniga Internet ka Malaysia, uu saxiixay heshiiska dhinaca amniga internetka.

Iskaashiyadan cusub waxay ka tarjumayaan sida ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka uga go'an tahay in la xoojiyo horumarka teknolojiyadda dalka, iyada oo kaashaneysa iskaashi caalami ah iyo hirgelinta hab-raacyada heerarka ugu sarreeya ee caalamka.



# DAAHFURKA XARUNTA QARAN EE IPv6

Tii ugu  
horreysay ee  
nooceeda ah  
ee laga  
hirgeliyo  
Qaaradda  
Afrika

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Jaamacadda Jamhuriya ee Culuumta & Teknolojiyada, oo kaashanaya Xarunta Macluumaadka Shabakadaha ee Afrika (AFRINIC), ayaa si rasmi ah u daahfuray Xarunta Qaranka ee Internet Baratakoolka IPv6, taasoo ah tii ugu horreysay ee noocan ah ee laga hirgeliyo Qaaradda Afrika, looguna talagalay in lagu hormariyo isgaarsiinta iyo adeegyada dhijitaalka ee dalkeenna.

Xaruntan cusub ayaa noqon doonta xarun u heellan cilmi-baaris, tababar, iyo hirgelinta teknolojiyada Internet Baratakoolka IPv6, iyada oo hubinaysa in Soomaaliya ay u gudubto kaabayaal internet oo ammaan badan, la



cabbiri karo, oo casri ah. Ka guuridda IPv4 ee loogu sii gudbayo IPv6 waa tallaabo muhiim ah oo kor u qaadaysa helitaanka internet-ka, xoojinta amniga shabakadaha, iyo taageeridda teknolojiyadaha soo baxaya sida 5G iyo waxyaabaha internet-ka ku xiran (Internet of Things).

Munaasabadda daahfurka ayaa waxaa ka soo qaybgalay mas'uuliyiin ka tirsan dowladda, madax ka socday shirkadaha isgaarsiinta, jaamacadaha, iyo daneeyayaasha muhiimka ah ee ka shaqeeya horumarinta isgaarsiinta dhijitaalka ee dalka.

Guddoomiyaha Jaamacadda Jamhuriya, Eng. Max'ed Axmed Maxamuud, oo ka hadlayay daahfurka, ayaa ammaanay

iskaashiga noocaan oo kale ee u dhexeeya hay'adaha dowladda iyo jaamacadaha si kor loogu qaado adeegyada dhijitaalka, isaga oo yiri: "Iskaashigan waa furaha horumarka teknolojiyada iyo aqoonta Soomaaliya. Xoojinta wadashaqeynta hay'adaha dawladda iyo jaamacadaha waa muhiim si loo dhiso dhaqaale dhijitaal ah oo xooggan."



**Eng. Max'ed Axmed Max'ud**  
**Gud. Jaamacadda Jamhuriya**

Waa socdaa.....  
Eeg Bogga 21



**Maareeyaha Hay'adda  
Isgaarsiinta Qaranka**

**Guddoomiyaha  
Jaamacadda Jamhuriya**

HIQ iyo Jaamacadda Jamhuriya oo kala saxiixday heshiis is afagarad (MoU)



IPv6 ma aha oo keliya casriyeyn isgaarsiinta Soomaaliyeed, balse waa aasaaska nidaam internet oo adkeys leh oo la jaanqaadi kara mustaqbalka teknolojyada horumarsan



**Mustafa Yaasiin**

Maareeyaha Guud ee Hay'adda, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa xusay muhiimada istiraatiijiga ah ee la jaanqaadka IPv6, isaga oo tilmaamay doorka ay ku leedahay ballaarinta adeegyada internetka, xoojinta amniga dhijitaalka, iyo hirgelinta teknolojyadaha horumarsan ee kaabayaasha isgaarsiinta ee dalka.

Wuxuu yiri: "Xaruntan waa guul muhiim ah oo lagu casriyeynayo qeybta isgaarsiinta ee Soomaaliya, islamarkaana lagu xoojinayo koboca dhijitaalka ah. IPv6 ma aha oo keliya casriyeyn, balse waa aasaaska nidaam internet oo adkeys leh oo la jaanqaadi kara mustaqbalka."

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojyada, H.E. Maxamed Aadan Macallin, ayaa xaqiijiyay sida ay dowladda uga go'an tahay horumarinta isku-xirka dhijitaalka ah, wuxuuna ugu baaqay dhammaan dhinacyada ay khuseyso inay taageeraan qaadashada iyo hirgelinta IPV6.



“

Daahfurka xarunta waxay astaan u tahay in Soomaaliya ay u gudubtay marxaladda casriga ah ee dhijitaalka ah, waxaan ku boorrinayaa dhammaan shirkadaha isgaarsiinta, jaamacadaha, iyo ganacsatada Soomaaliyeed inay door firfircoon ka qaataan hirgelinta Istiraatiijiyadda Qaranka ee IPv6.”


”

"Daahfurka xarunta waxay astaan u tahay in Soomaaliya ay u gudubtay marxaladda casriga ah ee dhijitaalka ah, waxaan ku boorrinayaa dhammaan shirkadaha isgaarsiinta, jaamacadaha, iyo ganacsatada Soomaaliyeed inay door firfircoon ka qaataan hirgelinta Istiraatiijiyadda Qaranka ee IPv6."

Intii lagu guda jiray munaasabadda, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Jaamacadda Jamhuriya ayaa kala saxiixday heshiis Isfaham (MoU), kaasoo rasmi ka dhigaya iskaashigooda isla markaana jaamacadda u xilsaaraya martigelinta xarunta. Heshiisku wuxuu qeexayaa iskaashiga xagga tababarka, cilmibaarista, iyo dadaallada wacyigelinta dadweynaha si loo fududeeyo u gudbida IPv6 ee Soomaaliya oo dhan.

Xarunta Qaranka ee IPv6 waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Istiraatiijiyada ICT-ga Qaranka ee Soomaaliya, taasoo xoojinaysa ka go'naanta dalka ee ku aaddan mustaqbal dhijitaal ah oo sugan, la cabbiri karo oo waara.

Dr. Maxamed Max'ud Xasan (Biday), Guddoomiyaha Midowga Jaamacadaha ayaa ka hadlay munaasabaddan ayaa ballan qaaday in Midowga



Jaamacadaha uu gacan ka geysan doono hirgelinta xarunta, isagoo xusay in ay fursad muhiim ah u tahay jaamacadaha dalka si ay door uga qaataan tababarada, cilmi-baarista, iyo horumarinta aqoonta la xiriirta IPv6.



Dr. Maxamuud Axmed Jimcaale, Agaasimaha Xarunta Daraasaadka Sare ee Jaamacadda Jamhuriya, ayaa sharaxaad kooban ka

bixiyay caqabadaha IPv4 iyo taariikhda isbeddelka cinwaannada internet-ka, kuwaas oo ku sheegay inay lagamamaarmaan ka dhigeen in Soomaaliya ay si degdeg ah ugu wareegto IPv6 si loo ballaariyo adeegyada iyo amniga internet-ka, loona fududeeyo isku xirnaanta casriga ah.



Cedrick Adrien Mbeyet, Madaxa Horumarinta Daneeyayaasha ee Xarunta Macluumaadka Shabakadda Afrika (AFRINIC), ayaa bogaadiyay

daahfurka Xarunta Qaran ee IPv6 ee Soomaaliya, isagoo xusay in talaabadan ay la jaanqaadeyso Istiraatiijiyadda Dhijitaalka ee Midowga Afrika (2020-2030).

Wuxuu muujiyay sida IPv6 ugu muhiim tahay koboca dhijitaalka, gaar ahaan dhinacyada xasiloonida internet-ka, horumarinta kaabayaasha isku xirka, iyo amniga shabakadaha.

# Maalinta Aqbalaadda Caalamiga Ah

Universal Acceptance Day



**MUNAASABADDA MAALINTA AQBALAADDA CAALAMIGA AH**  
Mowduuca Sannadka: Kobcinta Horumarka Dhijitaalka Loo dhanyahay

*Hal-ku-dhigga Sanadkan*



**"Kobcinta Ka-qaybgalka Dhijitaalka ee loo dhan yahay"**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay munaasabadda wacyigelin iyo tababar farsamo isugu jirta oo lagu xusay Maalinta Aqbalaadda Caalamiga ah (Universal Acceptance Day), taas oo diiradda saareysa aqbalidda magacyada domain-ka, ciwaannada iimaylka ee caalamiga ah (EAI), iyo hababka barnaamijyada aan ku salaysnayn farta laatiinka, iyadoo sanadkan hal-ku-dhigga ahaa "Kobcinta Ka-qaybgalka Dhijitaalka ee loo dhan yahay."

Munaasabaddan ayaa waxaa isugu yimid mas'uuliyiin iyo xirfadlayaal ka tirsan dowladda, hay'adaha horumarinta, bahda waxbarashada, shirkadaha isgaarsiinta, bixiyeyaasha



## Waa Maxay Maalinta Aqbalaadda Caalamiga ah?

Maalinta Aqbalaadda Caalamiga ah (Universal Acceptance Day) waa hindise caalami ah oo sannadde ah, looguna talagalay in lagu xoojiyo fahamka iyo muhiimadda internet loo wada siman yahay. Ujeeddadu waa in dhammaan magacyada domain-ka iyo ciwaannada iimaylka—iyadoon loo eegin luqadda, far-qoraalka, ama dhererka—si caalami ah looga aqbaldo dhammaan nidaamyada internet-ka ee la adeegsado.





Maareeye Ku-xigeenka HIQ

**Aqbalaadda Caalamiga ah waxay xaqiijineysaa in dhammaan magacyada domain-ka iyo ciwaanada iimaylka iyadoon la kala soocin in si caalami ah uga shaqeeyaan dhammaan nidaamyada internet-ka.**

adeegyada internet-ka, shirkadaha teknolojiyada, iyo urrarada bulshada si ay uga wadahaadlaan sida Aqbalaadda Caalamiga ah uga qayb qaadan karto dhismaha internet furan oo ay dhammaan bulshada Soomaaliyeed ka faa'iideysan karaan.

Maareeye Ku-xigeenka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Axmed Cali Salaad, oo munaasabadda furay, ayaa xusay muhiimadda ay leedahay Aqbalaadda Caalamiga ah, gaar ahaan doorka ay ku leedahay hannaanka isbeddelka dhijitaalka ah ee dalkeenna iyo sidii loo heli lahaa adeegyo internet ah oo loo siman yahay.

Wuxuuna yiri: “Aqbalaadda Caalamiga ah waxay xaqiijineysaa in dhammaan magacyada domain-ka iyo ciwaanada iimaylka—iyadoon loo eegin far-qoraalka, luqadda ama dhererka—ay si caalami ah uga shaqeeyaan dhammaan nidaamyada internet-ka. Taasi waxay naga caawinaysaa in aan dhiso jawi dhijitaal ah oo loo siman yahay, laguna kalsoonaan karo.”

Munaasabaddan oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Maamulka Furaha Internet-ka Qaranka ee hoos timaada Hay'adda, ayna taageeraysay Hay'adda Maamulka Magacyada iyo Lambarada Internet-ka (ICANN), ayaa ujeeddadeedu ahayd kor u qaadista wacyiga ku saabsan Aqbalaadda Caalamiga ah iyo xoojinta diyaar garowga farsamo ee ee lagama maarmaanka u ah ka hirgelinta dalkeenna.

Mabda'a Aqbalaadda Caalamiga ah ayaa ah in dhammaan magacyada



domain-ka iyo ciwaanada iimaylka—iyadoon loo eegin luqad, far-qoraal ama dherer—si caalami ah looga aqbalo nidaamyada internet-ka ee kala duwan.

Munaasabadda ayaa ka koobnayd soo bandhigyo farsamo iyo tababarro toos ah, iyadoo diiradda lagu saaray mowduucyo ay ka mid yihiin Magacyada Domain-ka ee Caalamiga ah (IDNs), Ciwaannada iimaylka ee Caalamiga ah (EAI), iyo hababka barnaamijyada lagu diyaariyo si loo dhiso mareego iyo barnaamijyo (websites and applications) u hoggaansan heerarka Aqbalaadda Caalamiga ah.



## Ujeeddada Munaasabadda Maalinta Aqbalaadda Caalamiga ah (UA)

- In la kordhiyo wacyiga ku saabsan Aqbalaadda Caalamiga ah (UA) iyo doorka ay ku leedahay dhismaha internet loo siman yahay.
- In la bixiyo tababar farsamo oo ku saabsan sida mareegaha, codsiyada, iyo nidaamyada iimaylka loogu diyaarin karo inay u hoggaansamaan heerarka UA.
- In la dhiirrigeliyo wada-shaqeynta hay'adaha dawladda, xirfadlayaasha IT-da, iyo bulshada rayidka si kor loogu qaado adeegyo dhijitaal ah oo u furan dhammaan isticmaaleyaasha, iyadoon loo eegin luqadda ama qoraalka ay adeegsadaan.



HIQ, oo kaashanaysa Hay'adda SODMA iyo ITU ayaa soo qabanqaabisay aqoon-is-weydaarsiga Xaaladaha Degdega ah iyo nidaamyada digniinta hore

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), oo kaashanaysa Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka (SODMA) iyo Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), ayaa soo qabanqaabisay aqoon-is-weydaarsi heer sare ah oo socday muddo laba maalmood ah.

Aqoon-is-weydaarsigan ayaa ku saabsanaa siyaasadda iyo qaab-dhismeedka nidaamka isgaarsiinta xaaladaha degdega ah iyo

## AQOON ISWEYDAARSIGA

Xaaladaha Degdega ah iyo Nidaamyada Digniinta Hore ee Taleefannada Gacanta

nidaamyada digniinta hore ee taleefannada gacanta (CB-EWS), oo qeyb ka ah Tiiirka 3aad ee hindisaha "Digniinta Hore ee Loo Dhan Yahay" (EW4All).

Aqoon-is-weydaarsiga, oo ka dhacaya magaalada Muqdisho, ayaa isu keenay daneeyayaal muhiim ah, oo ay ka mid yihiin shirkadaha isgaarsiinta iyo shirkadaha bixiya adeegyada internetka iyo qaar ka mid ah hay'adaha dowladda.



"Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxaa ka go'an dhisidda hannaan isgaarsiineed oo casri ah oo la isku hallayn karo, dabooli karana baahiyaha isgaarsiineed ee dalkeenna". *Mustafa Yaasiin*



Dr. Mustafa Almahdi, Wakiilka Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), oo hadal ka jeediyay furitaanka aqoon-is-weydaarsiga, ayaa xusay doorka muhiimka ah ee isgaarsiintu ku leedahay badbaadinta nolasha, isagoo adkeeyay sida ITU uga go'an tahay taageeridda dadaallada Soomaaliya ee hoos yimaada hindisaha Digniinta Hore ee Loo Dhan Yahay (EW4All).

Intii uu socday aqoon-is-weydaarsigu, ka-qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen xeer nidaamiyayaasha iyo shuruucda farsamo ee lagu hawlgelinayo nidaamka digniinta hore ee taleefannada gacanta (CB-EWS), habraacyada wadashaqaynta hay'adaha ee dirista digniinaha degdegga ah, caqabadaha farsamo iyo sharciyeed ee gudbinta farriimaha mobilka, iyo qorshaha lagu hirgelinayo CB-EWS si waafaqsan tiirarka kale ee hindisaha EW4All.

#### Aqoon Isweydaarsiga

## Xaaladaha Degdegga ah iyo Nidaamyada Digniinta Hore ee Taleefannada Gacanta

Ka qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen xeerarka nidaamiyayaasha iyo shuruucda heer farsamo ee lagu hawlgeliyo Nidaamka Digniinta Hore ee Taleefannada Gacanta (CB-EWS) ee Soomaaliya. Waxa kale oo laga dooday habraacyada wadashaqaynta hay'adaha ee lagu

Guddoomiye Ku-xigeenka SODMA, Dr. Axmed Cabdi Aadan, ayaa iftiimiyay baahida degdegga ah ee loo qabo in la xoojiyo diyaar-garowga qaran iyadoo la adeegsanayo teknoolajiyada casriga ah ee digniinta.

maareyo dirista digniinaha degdegga ah, iyadoo la aqoonsaday arrimaha farsamo iyo sharciyeed ee saameeya gudbinta farriimaha iyada oo loo marayo shabakadaha mobilada. Sidoo kale, waxaa lagu heshiiyay qorshe hirgelin ah oo nidaamkan ah, si loo waafajiyo tiirarka kale ee hindisaha Digniinta Hore ee Loo Dhan Yahay (EW4All).

Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo si rasmi ah u furay aqoon-is-weydaarsiga, ayaa xaqiijiyay sida ay Hay'addu uga go'an tahay dhisidda hannaan isgaarsiineed oo degdeg ah oo la isku hallayn karo, oo daboolaya baahiyaha dalkeenna.

Aqoon-is-weydaarsigan waxa uu qeyb ka yahay dadaallada socda ee lagu xaqiijinayo in dhammaan bulshadeenna ay helaan digniin hore oo degdeg ah oo wax ku ool ah.



# ITU DFR

## ARAB STATES REGION AMMAN 2025



Cammaan, Urdun

# SHIRWEYNAHA MADASHA HORUMARINTA ISGAARSIINTA EE DALALKA CARABTA

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka qaybgalay Madasha Horumarinta Dalalka Carabta (RDF-ARB) oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), taasoo lagu qabtay magaalada Cammaan ee dalka Urdun.

Madashan ayaa isu keentay mas'uuliyiin dowladeed, hay'ado nidaamiya isgaarsiinta, iyo hoggaamiyayaal ka socda qeybaha isgaarsiinta iyo teknooljiyada, si ay uga





wadahadlaan isbeddelka dhijitaalka ah, horumarinta xeerarka iyo sharciyeynta, iyo istaraatiijiyado lagu dardargelinayo Yoolalka Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs) iyada oo loo marayo teknolojiyada.

Intii lagu jiray madasha, Mudane Mustafa wuxuu ka qaybgalay dood cilmiyeed cinwaan looga dhigay: “Xaaladda Horumarka Dhijitaalka iyo Isbeddellada, Caqabadaha iyo Fursadaha.”

Wuxuu la wadaagay aragtiyo ku saabsan horumarka Soomaaliya ee dhanka dhijitaalka, isagoo xusay guulaha laga gaaray xeer-nidaaminta isgaarsiinta, adeegyada maaliyadeed ee mobilka, iyo

horumarinta kaabeyaasha dhijitaalka ah.

Sidoo kale, wuxuu ka hadlay caqabadaha la xiriira ballaarinta isku-xirka, heerarka hoose ee aqoonta dhijitaalka ah, iyo baahida loo qabo maalgashi ballaaran oo lagu sameeyo qeybta ICT-da ee dalka.

Shirweynahan ayaa qeyb ka ahaa diyaar garowga Shirweynaha Horumarinta Isgaarsiinta Adduunka (ITUWTD-25), waxaana laga soo saaray talooyin iyo qorshayaal lagu horumarinayo qeybta isgaarsiinta ee dalalka Carabta, iyadoo la tixgelinayo baahiyaha gaarka ah ee gobolka.





# Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-25)

## Riyadh, Sacuudi Carabiya.

Wafdi ka socday Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), oo uu hoggaaminayay Maareeyaha Guud, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, ayaa ka qeybgalay Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-25), taas oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) laguna qabtay magaalada Riyadh ee Boqortooyada Sacuudiga.

Madashan oo socotay seddax maalmood ayaa isu keentay madaxda hay'adaha isgaarsiinta ee caalamka, iyadoo is dhaafsaday waayo-aragnimo iyo habraacyadii ugu dambeeyay ee la xiriira nidaaminta isgaarsiinta iyo teknolojiyada.





Intii ay socotay madashu, Mudane Mustafa waxa uu ka qeybgalay dood cilmiyeed heer sare ah oo ay la wadaageen wakiillo ka socday dalalka Sacuudiga, Turkiga, Maraykanka, iyo Koonfur Afrika, taas oo looga hadlayay sidii loo dhisi lahaa mustaqbal dhijitaal oo waara.

Dooddu waxay diiradda saartay sida xeerarka iyo nidaamintu u xoojin karaan adkaysiga cimilada iyo hubinta in bulshooyinka si siman u helaan adeegyada dhijitaalka ah.

Hadalkiisa, Mudane Mustafa waxa uu ku muujiyay seddax mudnaan oo waaweyn: in la helo xog lagu kalsoonaan karo oo danta guud ah iyadoo la ilaalinayo asturnaanta; in shabakadaha ay sii shaqeeyaan marka ay jiraan xaalado degdeg ah; iyo in la dhimo kharashaadka si bulshada oo dhan uga faa'iideysato adeegyada dhijitaalka ah.

Wuxuu tusaale u soo qaatay sida xogta taleefannada gacanta ee qarsoodiga ah (anonymised mobile data) loogu adeegsaday in lagu taageero gurmada daadadka Soomaaliya.




Sidoo kale, Mudane Mustafa waxa uu ku booriyay in hormarka waara ee teknoloojiyada lagu daro shuruudaha rukhsadaha, gaar ahaan adeegsiga tamarta la cusboonaysiin karo, helidda kayd koronto goobaha muhiimka ah, iyo diyaarinta nidaamyo awood u leh gudbinta digniinnada qaran.

“Mudnaanta Soomaaliya waa in laga guuro tijaabooyin loona gudbo waxqabad dhab ah — xog lagu kalsoonaan karo la adeegsado, hormarka waara ee teknoloojiyada lagu dhex daro xeerarka, lana cabbiro waxa run ahaantii muhiimka ah,” ayuu yiri Mudane Mustafa.

Ka qeybgalka HIQ ee Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-25) waxa uu muujinayaa codka sii kordhaya ee Soomaaliya ku leedahay doodaha caalamiga ah ee nidaaminta, iyo sida ay uga go'an tahay dhismaha mustaqbal dhijitaal oo adkeysii leh oo waara.

# Kulamo Labo geesood ah ee ITU, Turkiga & Sacuudiga

*Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, ayaa kulamo heer sare ah la qaatay saaxiibada muhiimka ah ee heer gobol iyo heer caalami ee ka soo qaybgalay Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-25), si loo horumariyo iskaashiga iyo xoojinta ajendaha horumarinta dhijitaalka ah ee dalkeenna.*



Maareeyuhu waxa uu la kulmay Mudane Haitham Alohaly, Ku-simaha Guddoomiyaha Hay'adda Isgaarsiinta, Dayax-gacmeedka iyo Teknolojiyada ee Boqortooyada Sacuudiga (CST).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dhisidda qaab iskaashi oo dhex mara labada hay'adood, iyadoo xoogga la saarayo wada-shaqeynta ku saabsan nidaaminta garaadka macmalka ah (AI), teknolojiyada hawada sare, iyo wadaagista kaabayaasha.





Sidoo kale, Mudane Mustafa waxa uu kulan gaar ah la qaatay Mudane Ömer Abdullah Karagözoğlu, Guddoomiyaha Guddiga iyo Madaxa Hay'adda Hay'adda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada (BTK) ee Turkiga, intii lagu gudajirey Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-25) ee lagu qabtay magaalada Riyadh.



Wadahadalladoodu waxa ay ku saabsanayeen hormarinta iyo nidaaminta teknolojiyada sida maamulka garaadka macmalka (AI) iyo teknolojiyadaha cusub, iyadoo sidoo kale la falanqeyay in la abuuro qaab iskaashi laba-geesood ah oo nidaamsan si loo dhiirrigeliyo is-weydaarsiga aqoonta iyo dhisidda awoodda u dhaxaysa Soomaaliya iyo Turkiga.



Maareeyaha Guud wuxuu kaloo wadahadal istiraatiiji ah la yeeshay Dr. Cosmas Zavazava, Agaasimaha Xafiiska Horumarinta Isgaarsiinta ee ITU (BDT). Waxa uu maareeyuhu uga mahadceliyay ITU taageerada joogtada ah ee ay siiso Soomaaliya, gaar ahaan barnaamijyada socda ee sida Digniinta Hore ee Loo Dhan yahay (EW4All) iyo hirgelinta Qorshaha Qaranka ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah (NETP). Wadahadalladooda waxa ay muujinayeen muhiimadda ay leadahay xoojinta tirakoobyada ICT-da iyo ururinta xogta si loo taageero dejinta siyaasadaha ku saleysan caddeymaha iyo is-barbardhigga caalamiga ah, iyo sidoo kale dedejinta dhismaha Xarunta Ka Jawaabidda Xaaladaha Deg-degga ee Amniga Internet-ka (CSIRT), oo ah tiir-dhexaad ka mid ah qaab-dhismeedka amniga internetka ee dalka.





## MAALINTA GABDHAHA ICT-DA

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, iyada oo kaashaneysa Machadka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Qaranka iyo Machadka SIMAD iLAB ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay shirka Maalinta Gabdhaha ICT-da si loo xoojiyo looguna dhiirgeliyo gabdhaha iyo haweenka sidii ay ugu biiri lahaayeen xirfadaha ICT-da ee sii kordhaya.

Shirka ayaa waxaa ka soo qeybgalay mas'uuliyiin ka socday dowladda, hay'adaha horumarinta, jaamacadaha, shirkadaha isgaarsiinta, bixiyeyaasha adeegyada internet-ka, iyo ururrada bulshada rayidka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, oo furitaanka shirka ka hadlay ayaa tilmaamay sida ay hay'addu uga go'an tahay horumarinta xirfadaha dhijitaalka ee dhalinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan gabdhaha:

"Tan iyo 2018-dii, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay hormuud ka ahayd dadaallo lagu xoojinayo xirfadaha dhijitaalka ee gabdhaha, iyadoo qabanqabisay tartamo heer qaran ah, bixisay in ka badan 35 koorsooyin tababar ah oo si gaar ah loogu talagalay in lagu kordhiyo xirfadaha ICT-da ee muhiimka ah, si guul ah ayaan u tababarnay in ka badan 400 oo gabdhood. Dadaalladani waxay hoosta ka xariiqayaan sida ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) uga go'an tahay kobcinta aqoonta dhijitaal ah oo loo wada dhan yahay iyo in la xoojiyo jilka soo



socda ee haweenka dhinaca teknolojiyada”

Shirka ayaa sidoo kale lagu martiqaaday hoggaamiyaal iyo khubaro gudaha iyo dibadda ah, oo ay ka mid yihiin Lionel Laurens, Wakiilka UNDP ee Soomaaliya, iyo Dr. Ally Simba, Madaxa Ururka Isgaarsiinta Bariga Afrika (EACO), waxayna carabka ku adkeeyeen baahida loo qabo maalgelin joogto ah

oo la xiriirta waxbarashada Teknolojiyada iyo Sayniska (STEM) iyo barnaamijyada la-talinta si kor loogu qaado hal-abuurka dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxaa kaloo shirka lagu soo bandhigay fadhi-doodyo la xiriira waxbarashada Teknolojiyada iyo Sayniska (STEM), horumarka teknolojiyada iyo doorka haweenka, iyo tartan

ay gabdhuhu kusoo bandhigeen hal-abuurnimadooda dhanka ICT-da.

Gebogabadii, Mudane Maxamed Aadan Macallin, Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, oo shirka soo xirey, sheegay in dowladda Federaalka ay ka go’antahay in la dhiso mustaqbal dhijitaal ah oo loo wada siman yahay:

“Horumarka dhijitaalka ee Soomaaliya ma dhamaan doono ilaa dhalanyaradeenna fursad u hesho inay barato, ka qeybqaadato hal-abuurka, doorna ku yeelato hoggaaminta horumarka teknolojiyada dalka.”

Shirka Maalinta Gabdhaha ICT-da ayaa sii xoojinaya ballanqaadka HIQ ee ah in la taageero siyaasadaha ICT-da ee loo dhanyahay, la yareeyo farqiga dhijitaalka ee u dhexeeya labka iyo dheddigga, lana abuuro jawi sahlaya kobaca dhagaalaha dhijitaalka ah ee Soomaaliya.



# In ka badan 200

## Gabdhoo oo helay tababarro kala duwan

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Machadka Isgaarsiinta & Teknolojiyada Qaranka), iyo Machadka SIMAD iLab ayaa si wadajir ah u qabtay silsilad tababarro ah oo socday muddo isbuuc ah (12-23 Abriil 2025), si loogu xuso Maalinta Caalamiga ah ee Gabdhaha ICT-da (Girls in ICT Day).

Ujeeddada tababarradan ayaa ahayd in la xoojiyo aqoonta loona dhiirrigeliyo gabdhaha Soomaaliyeed inay ka faa'iideystaan fursadaha sii kordhaya ee ku jira teknolojiyada iyo isgaarsiinta, si ay door muuqda uga qaataan horumarka dhijitaalka ah ee dalka.

Gabdhihii ka qaybgalay tababaradan waxay qaateen siddeed maaddo oo kala duwan, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen barashada horumarinta mareegta (Web Development), naqshadeynta garaafyada (Graphic Design), yo hordhaca shabakadaha kombiyuutarka (Introduction to Computer Networking), iyo aasaaska amniga internetka (Cybersecurity Fundamentals).

Tan iyo sanadkii 2018dii ayay hay'addu si joogto ah u qabanaysay munaasabaddan oo caalamka laga xuso bisha April sanad kasta. Ilaa hadda, in ka badan 500 oo gabdhoo ayaa ka faa'iideystay tababarrada ay HIQ u qabatay gabdhaha Soomaaliyeed si kor loogu qaado helitaanka fursado siman oo dhanka teknolojiyada ah.



# Madasha Horumarinta Dalalka Carabta (RDF-ARB). Eng. Naciima Xasan ayaa ka qaybgashay



## Cammaan, Urdun -

Eng. Naciima Xasan Dhimbil, Madaxa Waaxda Isku-xirka, Qiimaha, iyo Adeegga Baahsan ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa ka mid ahayd wafdiga matalayay Soomaaliya ee ka qeybgalay Madasha Horumarinta Dalalka Carabta (RDF-ARB), oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), laguna qabtay magaalada Cammaan ee dalka Urdun bishii Febraayo ee sannadkan.

Intii lagu guda jiray madasha, Eng. Naciima ayaa si firfircoon uga qeybgashay fadhi doodeedyo oo lagu falanqeyay doorka haweenka iyo iskaashiga horumarinta xirfadaha ee gobolka Carabta.

Mid ka mid ah fadhi-doodyada ay ka qeybgashay wuxuu si gaar ah ku saabsanaa kobcinta

awoodda haweenka ee ka shaqeeya isgaarsiinta iyo teknolojiyada. Fadhi-doodkan ayaa lagu xusay muhiimadda ay leedahay dhismaha shabakado xirfadeed oo u gogol xaaraya haweenka doorkooda hoggaamineed, iyadoo la falanqeyay xeelado lagu xoojiyo fursadaha haweenka ee hoggaaminta iyo horumarka xirfadeed.



Sidoo kale fadhi-dood kale oo muhiim ah oo ay ka qeybgashay Eng. Naciima wuxuu diiradda saaray abuurista iskaashi wax-ku-ool ah oo lagu taageerayo horumarinta xirfadaha gobolka Carabta. Fadhi-doodkan ayaa ahaa madal firfircoon oo lagu dhiirrigeliyay iskaashi istiraatiiji ah oo la jaanqaadaya baahiyaha dhabta ah ee dhanka aqoonta, iyadoo lagu soo bandhigay habab cusub oo lagu dhisayo iskaashi waara oo fura fursado horumarineed.

Waxaa sidoo kale laga hadlay dardar-gelinta dadaallada lagu xoojinayo isbeddelka dhijitaalka, iyadoo la taageerayo kobaca dadka iyo horumarka guud ee gobolka.

# Shirka Kooxda Shaqada Farsamo (TWG) ee Mashruuca EARDIP

## Inj. Max'ed Cali Max'ud ayaa ka qaybgalay

Nairobi, Kenya -



Inj. Maxamed Cali Maxamuud, Madaxa Xarunta Maamulka Furaha Internet-ka Qaranka (SONIC), ayaa ka qaybgalay shirkii ugu horreeyay ee Kooxda Shaqada Farsamo (Technical Working Group - TWG) oo qeyb ka ah Mashruuca Isdhexgalka Dhijitaalka ee Gobolka Bariga Afrika (EARDIP), kaasoo lagu qabatay magaalada Nairobi intii u

dhaxaysay 24-28 Maarso 2025.



Shirkan oo ay soo qabanqaabisay Bulshada Bariga Afrika (EAC) ayaa diiradda lagu saaray horumarinta xeer-nidaamiye mideysan oo ku saabsan ilaalinta xogta, asturnaanta, iyo amniga internetka ee dalalka xubnaha ah EAC.


Shirka ayaa lagu aas-aasay hannaan lagu mideynayo mabaadi'da iyo shuruudda ilaalinta xogta iyo xuduud-dhaafka xogaha, si loo helo nidaam isku-xiran oo dhijitaal ah oo loogu adeego bulshada Bariga Afrika. Waxaa sidoo kale lagu go'aamiyay in la hirgeliyo tijaabo xuduud-dhaafeed (cross-border data pilot), si loo qiimeeyo waxtarka habraacyada iyo heerarka amniga xogaha ee waddamada xubnaha ah.

[Agaasime Maxamed waxa uu ka mid ahaa xubnihii matalayay dalkeena Soomaaliya, wuxuuna door muhiim ah ka qaatay doodihii la xiriiyay u diyaargarowga hirgelinta nidaamka asturnaanta iyo amniga dhijitaalka ee Gobolka Bariga Afrika.]

Agaasime Maxamed waxa uu ka mid ahaa xubnihii matalayay dalkeena, waxaana uu door muhiim ah ka qaatay doodaha la xiriiyay u diyaargarowga hirgelinta nidaamka asturnaanta iyo amniga dhijitaalka ee gobolka. Intii uu shirka socday, waxaa la bilaabay diyaargarowga Sharciga Ilaalinta iyo Asturnaanta Xogta ee Bulshada Bariga Afrika (EAC Data Protection and Privacy Act) iyo Qaabdhismeedka Sharciga ee Amniga Internetka (Cybersecurity Legal Framework), kuwaas oo la filayo in la dhammeystiro dhammaadka 2025.

# Shirweynaha Caalamiga ee Moobeylada (Mobile World Congress)

## Eng. Liibaan C/qaadir ayaa ka qaybgalay



**Barcelona, Spain: –**



Eng. Liibaan Cabdulqaadir Sheekh, Madaxa Waaxda Rukhsadaha iyo Korjoogteynta ee HIQ ayaa ka qaybgalay Shirweynaha Caalamiga ah ee Isgaarsiinta Moobeelada (Mobile World Congress), oo lagu qabtay magaalada Barcelona intii u dhaxaysay 26–29 Febraayo 2025.

Shirweynahan ayaa waxaa ka soo qaybgalay in ka badan 109,000 qof iyo 2,900 shirkadood oo bandhigyo kala duwan soo bandhigay. Shirweynahan ayaa diiradda lagu saaray arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin teknooliyada 5G, garaadka macmalka ah, iyo shabakadaha cusub ee adeegyada dayax-gacmeedka laga hago.

Intii uu socday shirweynahan, HIQ ayaa kulamo muhiim ah la yeelatay shirkado caalami ah oo hormuud ka ah soo saarista qalabka lagu kormeero hirarka iyo tayada adeegyada isgaarsiinta, iyadoo hay'addu qorsheyneyso in kor loo qaado tayada qalabka lagu maamulo hirarka iyo hubinta tayada adeegyada la siiyo bulshada. Sidoo kale, hay'addu waxay ka qaybgashay dooddoo ku saabsan maareynta iyo hirgelinta teknooliyadaha cusub sida 5G iyo garaadka macmalka ah.

Shirka ayaa sidoo kale lagu falanqeeyay sida shirkadaha isgaarsiinta ugu guuri lahaayeen qaabab ganacsi oo casri ah oo adeegyada lagu saleynayo garaadka macmalka ah iyo xoojinta iskaashiga ka dhexeeya shirkadaha, iyadoo sidoo kale ay soo badanayaan shirkadaha aan kaabayaasha laheyn (MVNO) oo ku tiirsan kaabayaasha shirkadaha waaweyn.

Waxaa lagu soo bandhigay habab cusub oo fududeynaya isku-xirka bangiyada iyo shirkadaha teknooliyadda maaliyadeed si loo helo adeeg dhammeystiran oo macaamiisha si toos ah ugu faa'iideystaan. Horumarradan ayaa saameyn togan ku leh Soomaaliya, oo horey ugu tallaabsatay wada shaqeynta shirkadaha isgaarsiinta iyo bangiyada, taasoo ka dhigtay teknooliyada maaliyadeed ee dalka mid ka mid ah kuwa ugu horumarsan gobolka.

### New Delhi, India -

Saciid Muxumed Bashiir, oo ka tirsan Waaxda ICT-da ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgalay Koorsada Shahaadiga ah ee Garaadka Macmalka ee Mas'uuliyadda Leh (CCRAI), taas oo lagu qabtay magaalada New Delhi intii u dhaxaysay 10-21 Febraayo 2025.

Koorsadan, oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Dowladda Hindiya, ayaa qeyb ka ahayd Barnaamijka Iskaashiga Farsamada iyo Dhaqaalaha ee Hindiya (ITEC), waxaana martigelisay Xarunta Horumarinta Kombiyuutarada Casriga ah ee C-DAC.

Tababarka ayaa si qoto dheer u dul istaagay dhinacyada anshaxa, sharciga, bulshada, iyo farsamada ee la xiriira garaadka macmalka, iyadoo si gaar ah loo barayay mabaadi'da cadaaladda, daahfurnaanta, isla xisaabtanka, amniga, iyo ilaalinta xogta.



## Qaar ka mid Shaqaalaha Hay'adda oo tababarro Dibadda ah ka qeybgalay



### Noida, India -

Kamaal Faarax Aadan, oo ka tirsan Waaxda Hawlgalka (Operation Department) ee HIQ, ayaa ka qeybgalay tababar cinwaankiisu ahaa "Mustaqbalka Shaqada iyo Teknolojiyada", kaas oo lagu qabtay Machadka Qaran ee Shaqaalaha V.V. Giri, ee magaalada Noida, ee dalka Hindiya, intii u dhaxaysay 10-28 Maarso 2025.

Tababarkan ayaa waxaa soo qabanqaabiyay Barnaamijka Iskaashiga Farsamada iyo Dhaqaalaha ee Hindiya (ITEC), oo hoos taga Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Hindiya.



Tababarka ayaa mowduucyada uu la xiriiray waxaa qeyb ka ahaa saameynta isbeddelada teknolojiyada casriga ah sida garaadka macmalka (AI) iyo teknolojiyadaha dhijitaalka ah ee saameyn ku yeelanaya suuqa shaqada iyo horumarinta xirfadaha.

Kamal ayaa fursad u helay inuu la falgalo ka qaybgalayaal ka kala socday dalal kala duwan, taas oo kor u qaadday fahamkiisa ku aadan isbeddellada shaqada ee heer caalami.

### **Nairobi, Kenya –**

Cabdiqaadir Xasan, oo ka tirsan Waaxda Isku-xirka, Qiimaha, iyo Adeegga Baahsan, iyo Cabdullaahi Hirad, oo ka tirsan Waaxda Rukhsadaha iyo Korjoogteynta ee HIQ, ayaa ka qeybgalay aqoon-isweydaarsi afar maalmood socday oo lagu qabtay magaalada Nairobi, 9–12 Juunyo 2025.



Aqoon-isweydaarsigan ayaa ku saabsanaa “Awood-dhisidda Hab Maamulka Xogta Soomaaliya iyo Wadatashiga Daneeyayaasha”, waxaana soo qabanqaabiyay Hay’adda Horumarinta Midowga Afrika (AUDA-NEPAD).

Ujeeddada aqoon-isweydaarsiga ayaa ahaa in la xoojiyo awoodda dalka ee hab-maamulka xogta (data governance), iyadoo la raacayo Qaabdhismeedka Siyaasadda Xogta ee Midowga Afrika (AU Data Policy Framework). Waxaa la is-weydaarsaday aragtiyo ku saabsan horumarinta siyaasad qaran oo xog ku saleysan, la falgalka daneeyayaasha, iyo dhismaha nidaamyo hufan oo lagu maamulo xogta dalka.

Labada sarkaal ee ka socday HIQ ayaa intii uu socday aqoon-isweydaarsigu door muuqda ka qaatay, iyagoo ka hadlay kaalinta Hay’addu ku leedahay horumarinta kaabeyaasha dhijitaalka ah iyo qaabdhismeedka hab-maamulka xogta ee dalka.

Aqoon-isweydaarsigan ayaa u gogol xaaraya horumarinta Siyaasadda Qaran ee Hab-maamulka Xogta Soomaaliya, taas oo muhiim u ah dhismaha dowladnimo dhijitaal ah oo ku dhisan caddaalad, hufnaan, iyo iskaashi.

### **Arusha, Tanzania –**

Cabdullaahi Maxamuud Eybakar, Maamulaha Nidaamka Shabakadaha ee Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa ka qeybgalay Madasha 2-aad ee Hoggaamiyeyaasha Dhijitaalka ee Bariga Afrika, oo ku saabsan Kaabeyaasha Dadweynaha ee Dhijitaalka ah, taas oo lagu qabtay xarunta Midowga Bariga Afrika (EAC) ee magaalada Arusha, intii u dhaxaysay 14–16 May 2025.

Madashan oo ay soo qabanqaabisay Xoghaynta Midowga Bariga Afrika ayaa looga hadlay sidii loo xoojin lahaa is-dhexgalka gobolka iyada oo loo marayo adeegyo dhijitaal ah oo wada shaqeynaya, gaar ahaan aqoonsiyada dhijitaalka ah, lacagaha elektaroonigga ah, iyo is-weydaarsiga xogta.

Madasha ayaa sidookale looga hadlay fursadaha ay Soomaaliya iyo dalalka kale ee gobolka ka heli karaan mashaariicda wadajirka ah, iyadoo la eegayo doorka kaabeyaasha dhijitaalka ah ee kor u qaadaya adeegsiga adeegyada dadweynaha iyo ganacsiga xuduudaha ka gudba.



# RAAD RAACA HORUMARKA

## DHIJITAALKA SOOMAALIYA



*Soomaaliya, oo muddo dheer ka maqneyd isgaarsiinta caalamka sababo la xiriira colaado iyo liidnaananta kaabayaasha Internet-ka, waxay hadda gashay xilli isbeddel dhijitaal ah oo qoto dheer.*



### Kacdoonka Dhijitaalka Soomaaliya

Dabayaaqadii 1990kii diishka VSAT-ka oo lagu rakibay saqafka sare ee guryaha ayaa ganacsatadu ka hirgeliyeen Muqdisho, Soomaaliya waxa ay ku tallaabsatay marxalado isku-xirnaan oo isa soo taraya. Furitaankii makhaaxiddii internet-ka ugu horreysay ee caasimadda 2001dii ayaa xaqiijisay in marin dabacsan oo bulsho loo heli karo shabakadda caalamiga ah.

Xagga badda, xarigii fiber-badeedkii ugu horreeyay wuxuu dalka soo gaaray 16kii Luuliyo 2010kii, markii EASSy uu ku soo degay Muqdisho; DARE-1 ayaana xigay oo Febraayo 2021kii adeeg rasmi ah ka bilaabay xiriirka Jabuuti, Boosaaso iyo Muqdisho.

Berbera waxay isu rogtay xarun istiraatiiji ah filada PEACE ayaa halkaas ku dagtay 6dii May 2022kii, halka Gulf 2 Africa (G2A) ay 2023kii Berbera iyo Boosaaso si toos ah ugu xiray Salalah, Cumaan. Waxa laban-laabmi doonaa xawaaraha shabakadda Internet-ka marka keebalka 2Africa oo 45000 km ah la shido dhammaadka 2025, iyo AFRICA-1 oo la filayo inuu hawl-galo horraanta 2026.

Xagga hawada, 2024kii Shirkadaha isgaarsiinta dalka ayaa daah-furay shabakaddii 5G ee dalka, iyadoo gaadhsiisay 81% daboolid sagaal magaalo waaweyn oo leh xawaareyaal heer multi-gigabit ah. Si loo daboolo deegaannada aan fiber-ku gaarin, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waxay 14kii Abriil 2025kii ruqsad siisay Starlink, taas oo hadda dalka oo dhan ka bixisa adeeg satelayt LEO ah oo gaaraya in ka badan 100 Mbps.

Sanadkan 2025, dalka waxa uu gaaray 10.7 milyan isticmaaleyaal Internet ah (55.2% dadweynaha), wuxuuna leeyahay qiimaha Internet-ka moobilka ugu jaban qaaradda Afrika. Soo degista silsilado fiber-optic ah oo badan, ballaarinta shabakadaha moobilka, ansixinta xeerarka, iyo bilaabista adeegga 5G waxay muujinayaan in Soomaaliya ay u gudubtay heer bulsho dhijitaal ah oo cusub.

Hannaanka cusub ee maamulka Internet-ka wuxuu dhidibbada u taagay is-dhexgal caalami ah oo loo dhan yahay, kaasoo si baahsan loo maamulo balse si isuduwid leh u shaqeeya. Qaabkan ayaa mustaqbalka saameyn ku yeeshay dib-u-habayntii magaca waddan ee Soomaaliya ee .SO iyo dhismaha hay'adaha maxalliga ah ee maamulka sida SONIC.

Si loo taageero kororka xawliga ah ee adeegyada, Soomaaliya waxay meel marisay sharciyo muhiim ah oo dhidibbada u taagay kaabayaasha, ammaanka xogta, iyo xuquuqda dhijitaalka ah ee muwaadiniinta:

#### • **Sharciga Isgaarsiinta (2017):**

Waa sharci saldhig u ah nidaaminta rukhsadaha shirkadaha isgaarsiinta, maamulka mowjadaha raadiyaha (spectrum), iyo isku xirka adeeg-bixiyeyaasha. Waxa kale oo uu xoojinayaa madaxbannaanida Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

#### • **Sharciga Ilaalinta Xogta (2023):**

Waxa uu la jaanqaaday Heshiiska Malabo ee Midowga Afrika, wuxuuna qeexayaa xuquuqda shakhsiyaadka ee la xiriirta xogtooda, nidaaminaya isu-gudbinta xogta xuduudaha dhaafsiisan, iyo waajibaadka hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka ah ee la xiriira ilaalinta xogta.

#### • **Xeerka xarkaha Badda Hoostooda Mara (2025):**

Wuxuu ku waajbinayaa shirkadaha maamula fiilooyinka badda iyo xarumaha lagu xiro dalka inay bixiyaan adeeg leh 99.99% waqti-furan (uptime), qiimo daahfuran leh, iyo gelitaan sinnaan ah oo ay helaan shirkadaha Internet-ka ee rukhsadda haysta. Waxa kale oo uu ku khasbayaa qorsheyaal xilliyo danbe ah oo looga hortagayo ciladaha iyo hakadka xiriirka.

### Mustaqbalka Dhijitaalka Soomaaliya

Iyadoo Soomaaliya ay ka faa'iideysanayso horumarka dhawaan la gaaray, tobanka sano ee soo socda waxay wadaan fursado hor leh oo ay dalka uga faa'iideysan

karo dhinacyada teknolojiyada, dhaqaalaha, iyo bulshada.

Dunida oo u sii tallaabeysa xagga 6G, amniga ka hortagga kombiyuutarada quantum-ka, garaadka macmalka ah ee xarumaha fog, iyo helitaanka dhijitaalka ee dhamaan bulshooyinka Soomaaliya waxay u baahan tahay qorshe istiraatiiji ah oo ay ku jaanqaado isbeddelladan caalamiga ah.

## Teknolojiyada Soo Baxaysa iyo Fursadaha Soomaaliya

### • 6G iyo Terahertz Communication:

Marka la gaaro bilowga 2030-meeyada, shabakadaha 6G waxay taageeri doonaan isgaarsiin hologram ah oo waqtiga-dhabta ah, makiinado caqli badan, iyo magaalooyin si buuxda u isku xiran. Si kastaba ha ahaatee, waxa wali jira caqabado dhanka tamarta ah iyadoo celceliska daboolka korontada ee dalka uu ka hooseeyo 20%.

### • Amniga DNS-ka ee Quantum-Resistant:

Maaddaama caalamka uu u socdo DNSSEC cusub oo difaac u leh xisaabinta quantum-ka, Soomaaliya waxay u baahan tahay in ay horumariso adeegsiga DNSSEC iyo teknolojiyada kale ee amniga Internet-ka. Balse wali waxaa dalka ka jirta baahi weyn oo loo qabo injineerada ku takhasusay dhinacyadan.

### • Edge AI iyo Micro Cloud-ka:

Codsiyada AI-ga ee ku saleysan deegaanka sida beeraha, waxbarashada iyo caafimaadka waxay horumarin karaan adeegyada meelaha fogfog. Hase yeeshee, Soomaaliya wali ma laha xarumo xogeed qaran (data centers) ama kaabayaal u diyaarsan AI deegaanka.

### • Xiriirka Ballaaran ee Qaran:

Isku darka Starlink iyo fiilada 2Africa waxay Soomaaliya u suurtoogelin karaan baahinta Internet-ka ee heer qaran. Si kastaba, celceliska xawaaraha Internet-ka ee go'an wali waa qiyaastii 18.8 Mbps taasoo xadidaysa kartida tartanka Soomaaliya ee adeegyada dhijitaalka ah.

## Jihada Istiraatiijiga ah ee Horumarka

Si loo xalliyo caqabadaha jira, qorshaha horumarinta dhijitaalka ah ee Soomaaliya ee 2026 - 2035 waa in uu mudnaanta siiyaa:

- Ballaarinta korontada magaalooyinka iyo miyiga
- Dhismaha xarumo xogeedka qaran (data centers)

- Waxbarashada STEM & tababarka injineerada AI
- Taageerada siyaasadeed ee Universal Acceptance iyo abuurista nuxur maxalli ah

Haddii ay Soomaaliya u dhaqaaqdo la jaanqaadidda heerarka caalamiga ah iyadoo isla mar ahaantaas dhiirrigelinaysa hal-abuurka gudaha, waxay yeelan kartaa awood ay ku noqoto dal wax-soo-saare dijitaal ah, halkii ay ahaan lahayd dal isticmaale oo keliya taasoo kor u qaadaysa doorkeeda gobolka iyo caalamkaba.

## Gunaanad

Safarka Internet-ka iyo kacdoonka dhijitalka ee Soomaaliya waa mid si xooggan oo xawli ah uga soo kabtay sanado badan oo caqabado ah, kuna tallaabsaday horumar muujinaya awoodda dal iyo dad isku duuban.

Laga soo bilaabo "L-O" ee ARPANET ilaa adeegga 5G iyo satelayt-ka Starlink maanta, Soomaaliya waxay muujisay in hal-abuurnimo maxalli ahi, taageero sharciyeed oo cad, iyo iskaashi caalami ah la iskugu dari karo si loo helo natiijooyin muuqda ayadoo kor loogu qaaday heerka isku-xirnaanta, la dhisay kalsoonida adeegyada dhijitaalka ah, isla markaana la xoojiyey kaabayaasha muhiimka ah.

Si kastaba ha ahaatee, halganka runta ahi wuxuu hadda ka bilaabmayaa sidii loo xoojin lahaa ballaarinta korontada, loo dhisi lahaa xarumo xogeed casri ah, loo tababari lahaa jiil cusub oo xirfadlayaal teknolojiyad iyo amniga Internet-ka ah, loona xaqiijin lahaa in adeeggu gaaro bulshooyinka aan weli ka faa'iidayan fursadahan.

Haddii Soomaaliya ay sii waddo in ay mudnaan siiso dawlad-wanaagga dhijitaalka ah, waxaa suurtagal ah in dalka uu ka gudbo heer isticmaale una gudbo heer wax-soo-saare dhijitaal ah oo Gobolka Geeska Afrika oo dhan saameyn ku yeesha.


Haddiiba la fuliyo istiraatiijiyad wadajir ah oo isugu jirta siyaasado adkeynaya madaxbannaanida dhijitaalka ah, maalgashi kaabayaal, iyo kobcin xirfado shaqaale, tobanka sano ee soo socda waxa ay Soomaaliya u noqon karaan waqti ay kaga miro-dhalin karto riyo ah in ay noqoto xarun kala-xirnaansho, hal-abuur iyo horumar loo siman yahay.

Waxaa la joogaa xilligii la xaqiijin lahaa in Internet-ka iyo teknolojiyadu ay noqdaan kuwo kobcinaya nolol maalmeedka, dhaqaale, iyo fursadaha jilasha maanta iyo kuwa berri.



## *Wadatashi ku saabsan:*

# Hirgelinta Shabakadda Isgaarsiinta Isku-xiran ee Geeska Afrika (ONA)



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa qabatay wada-tashi ku saabsan hirgelinta Shabakadda Isgaarsiinta Isku-xiran ee Geeska Afrika, (East African Community One Network Area (ONA)) oo ah hindise goboleed lagu yareynayo kharashaadka isgaarsiinta xuduudaha la isku maro isla markaana lagu horumarinayo isdhexgalka dhijitaalka ah ee Bulshada Bariga Afrika.

Wada-tashigu wuxuu isu keenay shirkadaha isgaarsiinta si ay dib u eegis

ugu sameeyaan qorshaha Soomaaliya ee ku biirista ONA iyo inay soo gudbiyaan talo iyo jawaab celin ku saabsan diyaarinta farsamo iyo sharci ee looga baahan yahay.

Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, oo furay kulanka, ayaa xusay muhiimadda hindisahan, isagoo yiri: "Ku biirista Soomaaliya ee Shabakadda Isgaarsiinta Isku-xiran waxay ka dhigan tahay dhimista kharashaadka



adeegga roaming-ka, kobcinta isku-xirnaanta bulshada Bariga Afrika, taageeridda isbeddelkeenna dhijitaalka ah, iyo xoojinta iskaashiga dhaqaale ee gobolka.”


Intii uu socday kulanka, Hay'addu waxa ay soo bandhigtay Khariidadda Qaran ee Soomaaliya ee ku saabsan hirgelinta ONA, taas oo qeexaysa marxalado lagu fulinayo.

Qorshe-hawleedku wuxuu bixinayaa waddo cad oo lagu waafajinayo shuruucda qaranka iyo taciifooyinka heerarka gobollada, diyaarinta xeer-nidaamiyeyasha, iyo hubinta

isdhexgalka loo dhan yahay.

Kulanka wada-tashiga waxa uu noqday madal wada-hadal oo u dhexaysa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo shirkadaha isgaarsiinta, taas oo adkaysay ballanqaadka wadajirka ah ee ku aaddan isgaarsiin xuduudeed oo la awoodi karo.

Soomaaliya waxa ay qorsheyneysaa in ay sida ugu dhaqsiiyaha badan u dhammaystirto hirgelinta ONA, taas oo siin doonta macaamiisha Soomaaliyeed adeegyo roaming oo jaban, isla markaana kor u qaadi doonta fursadaha isku-xirnaanta dhijitaalka ah iyo iskaashiga dhaqaale ee gobolka oo dhan.



# Warsidaha ISGAARSIIN



Sanadka 3aad  
Caddadka 4aad  
Janaayo - Juun, 2025

# NCA



*"Ka sokow inuu warsidahani yahay goob aan ku ururino, ku keydino, kuna soo bandhigno waxqabadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, haddana wuxuu noqon doonaa goob laga dheehan doono gudashada waajibaadkeena iyo xilka aan u hayno ummadda Soomaaliyeed."*

*Mustafa Yaasiin Sheekh*

Maareeyaha Guud  
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka





@ : info@nca.gov.so

🌐 : <http://www.nca.gov.so>

f : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

✉ : @SomaliaNCA

in : National Communications Authority of Somalia

Warsidaha  
**ISGAARSIIN**